C/RASHIID CALI MAXAMUD

{BUKHAARI}

Buuga waadiga NOLOSHA

Tusmada Buugga

Hibayn 2
Mahad-Naq 3
Erayga Qoraaga Buugga 5
Afeef 6
Hammi 7
Dhaqanka 9
Guurka 13
Aqoonta 54
Guusha 63
Guurka 72
Xumaanta Qabyaalada 85
Xaalka Soomaalida 95
Wakhtiga 102
Fikirku Ma Furaha Waalida? 111
Jaceyl 118
Talooyin Wax Ku Oola 135
Xigasho 137

HIBAYN

Buuggan, ka warramaya waayaha nolosha, waxa aan u hibeynayaa dhamaman bulshada Soomaalida ah meelkasta oo ay kaga nool yihiin daafaha adduunka, waxaan sigaara ugu hibeynayaa labadayda waalid: *Hooyo Xaawa Cabdilaahi Aadan iyo Aabbo Cali Maxamuud Muxumed.*

Buuggani waxa uu diiradda saaraya kana war bixinayaa, waxyaabo ku saabsan nolasha Aadamaha.

Waxaan buuggan mar labaad sigaar ah ugu hibeynayaa da'yarta Soomalida ee ku hawlan ka midha dhalinta hammigooda nololleed iyo hiigsigooda adduun, kuna hanweyn, inay hayaankooda nolosha ku furaan kob badhaadhe iyo barwaaqo ah.

MAHAD-NAQ

Mahad oo dhammi waxa ay u sugnaatay Allaha igu dhaliyay Buuggan.

Waxa kale oo aan halkan ugu mahad-naqayaa asaxaab iyo akhristayaalba intii bogaadinta iyo boorinta illa garab taagnayd, muddadii aan qoraalkan waday.

Sidoo kale, waxaan mahad-naq aan duugoobayn u hayaa Adeerkay Xasan Sh Axmed Aw Abiib oo isaga la'aantii suurto gal ayna noqoteen inaan buuggan qoro.

Waxa kale oo aan u mahad-naqayaa Axmed-yaasiin Cabdiraxmaan Axmed Buraale oo tafatir iyo turxaan bixinba ku sameeyay badi qoraaladda buugga, ahna macallinkayga af- soomaaliga.

Mahad-naq lamida waxaan ujeedinayaa Hal-abuur Cabdiraxmaan Ismaaciil Yuusuf Naalleeye oo maal ahaan iyo maskax ahaanba igula garab taagnaa tan iyo maalintaan bilaabay buugga qoraalkiisa, ahna macalinkayga af-soomaaliga.

Waxaan iyana si gaara ugu mahad-naqayaa dhamaan shaqsiyaadkii maal ahaan, maskax ahaan, iyo dhiiri galinba igala qayb qaatay buuggan, kuwaas oo kala ah:

1: Pro Cabdisamad Yuusuf Guuleed
2: Sh Ibraahim Cumar Jaamac
3: Dr Cabdiqaadir Cabdilaahi Aw Cali Guleed
4: Sh Yuusuf Sh Nuux Sh Xuseen
5: Sh Cabdilaahi Cali Saahid
6: Cali Xasan Cabdile
7: Maxamed Cawil Cabdilaahi
8: Khadar Maxamed Yuusuf
9: Dr Jimcaale Sh Xasan
10: Khadar Xasan Cumar
11: Qoraa Xaamud Kheyre Yuusuf
12: Dr: Khadar Cabdi Cabdilaahi
13: Eng Mukhaar Maxamed Siciid
14: Eng Khadar Cabdi X. Xirsi
15: Cabdiraxmaan Cali Maxamuud
16: Suhayb Cali Maxamed
17: Axmed Saleebaan Maxamuud
18: Xamse Xasan Cabdilaahi
19: Cabdiraxiin Xuseen Coomay
20: Mawliid Cabdilaahi Yoonis
21: Maxamed Dayr Cilmi
22: Nimco Kayse Cabdi Ibraahim
23: Xanaan Cabdiraxmaan Faarax
24: Niciima Cabdiraxmaan Faarax
25: Hoodo Xuseen Xasan
26: Hibaaq Aadan Warsame

Erayga Qoraaga Buugga

Muddo badan ayuun baan is waydiinayay: ma wax la qoro ayayna lahayn, mise cid wax qorta ayaanay haysan? Wercelinta waydiinta iyo dhiiri galinta akhristayaasha ayaa igu dhaliyay inaan qoro buuggan hortaada yaala. Buuggani waxa uu koobsanyaa maqaalo kala duwan, kuwaas oo koob sanaya waxyaabo ku saabsan nolasha aadamaha.

Hawlkasta oo banii aadamku qabto dal-daloolo lagama waayo. Iyada oo ay taasi jirto, maxaad u malayn qoraal uu sameeyey shaqsi qalin barad ah? Maxaad u malayn qoraal uu qoray arday ku gudo jira waxbarashada iyo waayihiisa nololleed? Waa arin culayskeeda leh, haddana waxa aan ku dedaalay intii kartidayda ahayd In aanan ku guul daraysan buuggan, Allana igu garab galo.

Ugu danbayn waxaan rajaynayaa in Buuggan wax badan ka tari doona dhibaatooyinka badan ee inagu habsaday, dhalinyaro badana oo rabto in ay wax qoraana dhiiri galin u noqon doono.

Akhri ka dib, wixii dhaliila ama dhiiri galin ah waxaad iigu soo hagaajisaan ciwaankan,

Abdirashiidcali79@hotmail.com ama ciwaanka baraha bulshada ee facebook oo ah cabdirashiid cali maxamuud

Afeef

Allaha ha unaxriistee abwaan Maxamed Xaashi Dhamac (Gaarriye) ayaa waxa uu ku tibaaxay maansadiisa Ergo erey-yadan:

Hadraawoow indhaweydba
Sidaydii ma haynoo
Waxaan ahay nin arkaaya
Waxaan uunku u jeedin
Oo kaligii anfariirsan!

Isla markale waxa uu abwaanku tilmaamayey isaga oo muujinaya inaan Aadame gef laga waayeyn tuducyadan:

Nin raggi eraygiisana
Astaan buu u dhigtaaye
Rabboow eex ma tiraabine
Aqoon ha igu cadaabin

Sidaa darteed waxaan si calool fayow oo kal iyo laaba uga afeefanayaa qaladaadka buuggan ku jira haddii ay ahaato mid la xidhiidha afka-soomaliga, iyo mid hab qoraaleedba.

Wixii khaldan naftayda iyo shaydaan ayaan u aanaynayaa, wixii saxsana waa towfiiq Alle, Eebbe ayaan ugu mahad naqayaa waafajinta uu iwaafajiyey.

HAMMI

- Hayinkayga geeddiga
- Halkaan hiigso leeyahay
- Waa horaan qorsheeyoo
- Hammiggayga oo idil
- Hillin baan ujeexoo
- Hammuuntaan uqabaa
- Qalbiga I holcinaysoo
- Hadal iyo hawraarba
- Waataan hilmaameen
- Hurddadii ka tagayee
- Saqda dhexe habeenkii
- Sidda wiil hamuun qaba
- Is hiifoo is hawlee
- Hor illaahay eebboow
- Himmiga ii hirgaliyoo
- Ha igu qadin baryada
- Higgil meel ka baxay baan
- Walee hiigso leeyoo
- Ma hadhgalo dharaartii
- Hammi igu lammaan baa
- Maanka iga haystoo
- Sidda wiil horweyn geel
- Laga dhacay hayinadiisaan
- Nafba kala hayaanoo
- Hawd baan dhex xulayaa
- Maruun inaan libinta hantiyo

- Ayuu hammigaygu yahee
- Hor illaahay eebboow
- Hammiga iigu hirgaliyoo
- Ha igu qadin baryada
- Hawlaha adduunyadu
- Halisiyo dhibaatiyo
- Hanfi iyo dab weeyee
- Nina guusha hawl yari
- Kuma hanan karaaye
- Hor illaahay eebboow
- Hammiga iigu hirgaliyoo
- Ha igu qadin baryadda

Cabdirashiid Cali Maxamuud (Bukhaari)

DHAQANKA

Waa maxay dhaqan?

Dhaqan waa aminaad iyo caadooyin hab-nololeed oo ay umad gaari ahi leedahay.

Dhaqanku waa astaamo ay leeyihiin umad gaar ah, kuna daaran hawl-qabadyadooda ay qabtaan iyo nolasha caadiga ah taasi oo ay sa ka fikirin aminta ay samaynayaan, maadama oo ay ka dhexleen awoowyaashood isla markaana ay adag tahay sidii ay u joojin lahaayeen.

Umad ama qoomiyad kasta oo aduunka ku nooli waxa ay leeyihiin dhaqamo ugaara, taasi oo suutro galinaysa in la ogaado deegaanka ay ka soo jeedaan ama ay ku abtirsadaan.

Sidaa si lamida umada soomalidu waxa ay leedahay dhaqamo u gaara oo soo jiray qarniyo badan.

Umada soomaalidu waxa ay laahayeen habdhaqan, caadooyin labis iyo waliba farshaxano ay ku sun tanayeen, taasi oo leh cadaymo ilaa maanta lahayo.

Dunida waa ay horumaraysaa ilaa inta uu aadamahu dul joogo aduunka guudkiisa.

Dunida waxa ay ahayd baaxado kala tagsan oo kala durugsan, taasi oo ay kala qaqobaysay xuduudaha

udhaxeeya hanaqoto badaha ama dhulka oo kala durugsan.

Caqabadaha maanta xalka loo helay ee ah hawl fudaydiyaasha sida gadiidka iskaga kala gooshaya qaarad ka qaarad taasi oo keentay is dhex galka dadyowga aduunka ee kala dhaqanada in ay is dhexgalaan.

Inkasta oo ay jiran dhibaatooyin kala gadisan, haddana dadyowga dunidu waxa ay maanta ku guulaysteen siddii loo samayn lahaa xidhiidh u dhaxeeya dadyowga dunida.

Wakhtiyo badan oo la sameeyay da'daal dheerada waxa maanta lagu guulaysaytay in ay dunidu noqoto ha tuulo oo isku taxan sida tusbaxa.

Soomalidu waxa ay nasiib u yeeelatay in ay dhaxlaan dhaqan ku sar go'an shareecada diinta islaamka oo ay ka dhaxleen awoowyadood.

Si kastaba ha ahaate waxa si talaabo talaabo ah isku badalayay dhaqankii ay soomali lahayd, taasi oo ay ugu wacan tahay dhex-galka iyo macaamilka bulshooyin ay kala dhaqan yihiin taas oo samayn balaadhan ku yeeshay dhaqankii hodanka ahaa ee ay ku faani jirtay umada soomalidu meelkasta ha joogtee.

Wakhtiyadan danbe waxa kor u kacay heerka isbadalka dhaqanka soomalida iyada oo ay isbadaleen qaar ka mid ah, halka qaar kale ay dabar go'eenba.

Sababaha loo aanaynayo isbadalka ku yimid dhaqanka soomilada ayaa waxa hor kacay xidhiidh la samaynta bulshooyinka ay kala dhaqan yihiin isgaadhsiinta heer caalami.

Dhaqankii soomaaliyeed ee hore waxa uu ahaa dhaqan kala danbayn, gal-gacal, iskashi, is xurmayn ku dheehan tahay, qof walbana heerkiisa lagu maamuso oo lagu sharafo.

Bulshada soomaaliyeed waxa ay ahaayeen dad reer guura ah oo xoolo dhaqato ah, kuwaas oo ku noala baadiyaha, mana aysan badnayn kuwooda ku nool bandarradaha.

Ganacsiga iyo xidhiidhka bulshooyinka ka soo galay dhanka xeeebaha ayaa waxa uu sababay in ay umada soomalidu dagto xeebaha.

Dadyowgii joogay xiligaas ee daganaa xeebaha waxa ay diyaar u noqdeen in ay soo dhaweeyaan qaababka ay u dhaqmaan dadyowga ay kala duwan yihiin, halkaas oo uu isbadal weyni ku dhacay hab nololeedkii bulshada soomiliyeed ee deganaa magaalooyinka ku taxnaa xeebaha.

Soomaalidu maxay dhaqan u lahayd?

Haddii aynu is idhaa soo ururiya umada soomalidu waxa ay dhaqan ulahayd kuma soo koobi karno halkan, hadab bal aan soo qaadano qaar kamida sooyaalkii dhaqanka soomalidu iyo waxii ay ku faani jirtay.

Inagoo ka eegi doona dhinacyo fara badan, gaar ahaan xoolaha, guurka, ciyaar dhaqameedyada, hu'ga, maamulka, garta iwm.

XOOLAHA

Xooluhu waxa ay ahaayeen laf-dhabrta ay noloshoodu si toosa ugu tiirsantahay.

Xoolaha ay soomalidu dhaqan jirtay waxa kamida:-

- **Geela**
- **Lo'da**
- **Adhiga oo laba nooc ukala baxi jiray**

Ummada soomaalidu seddexda nooc ee xoolaha ee aay dhaqdaan waxa agtooda qiimo aada kalahaa geela uguna munaafacaad badnaa, waxa isna soo raaci jiray gammaanka oo agtooda kaalin weyn ugu jirey.

Waxa cadayn u ah in ay ummada soomaalidu aad u jeclaayeen geela iyo gamaanka, maansooyinka ay kaga hadlayaan qiimaha iyo qaayaha uu agtooda ka lahaa geela iyo gammaanku.

GUURKA

Guurku waa heshiis sharci diineed ku fula.

Guurka waxa uu lahaa noocyo kala duwan waxan kamid ahaa:-

- Geed fadhiisi: geed fadhiisigu waa inanta oo si sharaf leh oo loogu doonto xidhaheega, waana nooca guurka ugu saraysa ee inan loogu geed fadhiisto.
- Dhabar garaac: dhabar garaacu waa inanta oo uu xoog ku kaxaysto inanku, isaga oo ay la socdaan saaxiibadii.
- Godob-reeb: godob reeb waxa ay ujeedadiisu tahay in godob ama colaad u dhaxaysa laba reer lagu dhameeyo, wiil iyo gabadh ka soo kala jeeda labada beelood ee colaadu ka dhaxaysay ayaa la isa siin jiray, si ay meesha xididnimo u timaado, dhib danbana ayna u dhicin.
- Masaafe: nooca guurkan ah waa marka uu inanku la baxsado inanta uu jecel yahay, isagoo ka baqaya haddii uu waydiisto odayga xidhaheeda ah in uu diido.

  Bal aan soo qaadano sheeko caan ka ah dhamaan gayiga ay soomaalidu dagto oo ku saabsan nooca guurkan ah ee masafada. Ninka ay sheekadu ku dhacday waxa la yidhaahdaa kaba calaf, kaba calaf waxa uu sheeko wadaag la lahaa Huryo Ugaas waanu la soo tagay, huryo waxa ay ahayd gabadh Alle ku manaystay caqli iyo garaad badan, kaba calaf

waxa gabadha la soo kaxeeyey nin ay saaxiibo ahaayeen. La tagisku waa marka uu inanku ka baqdo in uu inanta u geed fadhiisto ama uu reerkooda waydiisto ee uu fiidka la gudo.

Intii ay jidka ku sii jireen ayaa waxa ay Huryo su'aalo ku tuurtay labadii nin, iyadoo si sarbeeba ama duurxula u waydiinaysa. Kadib markii subixii la gaadhay ayaa ay ku leexdeen meel geed ah waanay fadhiisteen, kadib ayaa ay huryo waydiisay su'aal, waxaanay ku tidhi maynaan nasanayn? Waxa u jawaabay kaba calaf oo ku yidhi sownaga geedka hoos fadhina, ninkii kale ee la socday ayaa isagu jawaabtii saxda ahayd siiyay huryo waxaanu yidhi waxa ay uga jeeda maynaan kabaha iska saarayn, markaasa si wacan loo nastaaye.

Cabaar markii ay socdeen ayay hadana waydiisay maynaan afurayn? Ninkii gabadha la soo tagay ayaa ugu jawaabay sownaga meel banana socona, waxa markiisii qaatay ninkii la socday oo isagu sheegay jawaabta saxda, waxaanu yidhi waxa ay uga jeeda maynaan cadayanayn. Ugu danbeyntii waxa ay waydiisay adeeti? Adeetidu waa marka aad ku soo dhawaato oosha, dareentana sida raad aad aragtay, cidii xoolaha oo aad maqashay amase koortii xoolaha, markaas ayay tidhi waxaan arkaa adeeti, ninkii la soo tagay ayaa ugu jawaabay oo meel kayn ah ayaynu dhex socoanaaye xageed ka aragtay

adeetida? Ninkii kale ee la socday ayaa ugu jawaabay war waxa ay uga jeeda haad baan arkaa, haadkuna waxa uu ka ag dhow yahay meel ay dad joogaan. Aduu markii ooshiii la keenay ee ay gaadheen ayaa waxa loo soo dhigay raashin, raashinka waagaasi waxa uu iska ahaa yaabis, raashinkii ayaa labadii nin dhan isku mareen iyadiina dhinac, cabaar markii la cunay ayaa dhankeedii qarax noqday, caanihii iyo iyo subagiina dhankooda ayaa ay isku mareen, inan xishood baa lagu ogaaye wax ka xishootay inay raga ku tidhaahdo waar dhankaygii qarax buu noqday, laakiin hab farshaxnimo ah ayay adeegsata inta ay fandhaalkii qaadatay ayaa waxa ay tidhi kaba calafoow hadalkii aad maanta igu tidhi markii aan soo wada socoanay sidaasa caloosha la ii kala dilaaciyay inta ay gacan soo jeexatay, iidaankiiba dhinaceeda ayuu u qulqulay.

Ninkii kalaa ku fahmayoo waxa uu yidhi jawaabtii aad I tidhi calooshaa sidaa la ii walaaqay, inta uu raashinkii isku walaaqay si uu iidaanku isu wada gaadho. Inantii markii wadaadkii loo keenay ee la is yidhi meheriya ayaa waxa ay tidhi dooni maayo kaba calaf ee ninka kale ee ila waday ha la ii maheriyo. Gabadhii ninkii way iska soo taagtay. Cabir baa jirey lagu tijaabin jirey dadka, su'aalahaas ay maanta oo dhan ay su'aalaysay waxa ay ku ku eegaysay maskaxdiisa.

- Xigsiisan: nooca guurkan ah waa marka ay ninka ka dhimato aafadiisii, caruurna ay ka tagtay, hadaba si caruurta loo daryeelo oo aanay ciyaalkaasi u baabin ayaa ninka waxa la siiya gabadha ka dhimatay walaasheed si ay ciyaalka u daryeesho.
- Dumaal: nooca guurkan ah waa marka uu gabadha ka dhinto saygeedii, kadib waxa lasameeya si aan ciyaalka uu ka tagay ayna u dhib mudan waxa gabadha lagu dara ninka dhintay walaalkii ama nin aan sidaa ugu sii dheerayn oo ay tol yihiin.

Tusaale waxaynu u soo qaadan karnaa, tixdii gabaygii Abwaan Cabdilaahi Suldaan:-

Haddii naag ninkeedii mudnaa, mowdku kala qaaday.
Oo macangag liita u hadhay, yeeshay meherkeedi.
Oo inay ka meermeeriyaan, magane doonaysa.
Madoobaadayeey xalay, miyay murugtay laabtaydu.

Heerin: waa marka ay gabadhu da'dee yara weynaato, kadib ayay safaru bixi jirtey; si ay u hesho qof nolosha la qaybsada. Hablhii hore marka aya inantu noqto garab weyn ayaa ay Israaci jireen oo ay odhan jireen aan calaf doonano.

Waxa latilmaama sadex hablood oo heerina ah, ayaa u imid dagmo, deetana nin oday ah ayaa yidhi Waar hablaha aynu iska tijaabino, kadibna hablhii ayaa lagu yidhi halkaa sii fadhiista raashin ayaan idiin keenaynaaye. ka dibna neef aya loo loogay, xeedho

hiliba ah oo kulul kuluul kuluul kulul ayaa loo geeyay, ragna waxa la yidhi u kuur gala oo xeedhada agteeda fadhiista oo bal waxay ku hadlayaan soo dhagaysta.

Tii ugu horaysaa ba markiinba gacnta daf siisay deebtana way kal soo booday kulaykii. Deebtana way tidhi “kululaa kama naaleey “tii labaad baa tidhi “naa kam kaadsan karnee kala goo” tii saddexaad baa tidhi “naa ha karfafeee korka saar” nimankiiba warkii ku duxay, sadexdaa eray bayna yidhaahdeen hablihii.

Waxa la yidhi ta koowaad waa ay samir darantay, waayo waxa ay sugi kari wayday inanta uu hilibku ka qaboobayo.

Taa labaadna waa aya hunguri xun tahayoo waa tii tidhi hilibkoo kulul inoo kal goo. Ragii waxa ay ku heshiiyeen in ay ta saddexaad kala baxaan taasa samir lee, hablhii tiibaa lagala baxay. Qiimayn noocaasa ayaa jiri jirtay oo wax lagu cabiro barigii hore.

Noocyada Ciyaaraha Hidaha Iyo Dhaqanka

Waxa ay ummada soomaalida leedahay ciyaaro loo yaqaan hidaha iyo dhaqanka oo lagaga ciyaaro deegaanada kala duwan ee soomaalidu degto, waxana kamida:-

3.1.3.4.1 Ceerigaabo

Waa ciyaar dhaqameed laga ciyaaro gobolka sanaag, waxaana loogu magac daray caasimada gobolka ee ceerigaabo, waxaanay ka mid tahay afarta ciyaarood ee ugu waa weyn ciyaaraha dhaqanka, waxay leeedahay faracyo badan oo kasii farcama, kuwaas oo kula duwan habka loo boodo, xiliga la ciyaaro ama noocyada ragga iyo dumarka ee ciyaareed.

Markay wiilashu ciyaaranayaan adinkay iska rogaan, habluhuna way is wareejiyaan waxaana kamida ah noocyada loo ciyaaro kuwa hoos ku qoran:-

1. **Hana haaban**

Waxa ciyaara ragga waxaana la ciyaara galabtii, marka la galayaana kolba afar nin ayaa gala oo boodo, waxaanay ku heesaan midhahan

Hobeey hana haybsan

Ninn haabta ma hantee

2. **Hoo laban**

Marka danbana waxa loo gudbaa ciyartan hoo laban la idhaahdo oo iyadu sacab iyo bootoba leh, lix jeer baana lays meereeya 'lays rogaa' haduu doono inanka boodaya adinba sadex jeerbu rogaa ama dhan qudha ayuu iska wada rogaa, waxaana loogu heesa sidan:-

Hoo laban kurbaan laban,
Hobeey hoobalayeey hobeeya,
Anagu faanka ma naqaane,
Hoo laban kurbaan laban,
Dhiig uun baan falaq ka siina,
Fariin baa inoo timid,
Hoo laban kurbaan laban,
Xalay foodhi galawgii,
Fariinba inoo timid.

- **Hogol fiid**

ka dib ciyartaa aynu kor kuso sheegnay waxa loo gudbaa hogol fiid, oo iyaduna ah ciyaar jiib iyo jaanba leh, heeseheeduna waa sidan

Hobeey hobeey hobeeyay,
gabbal dhacay gadaalkii,
Ceelkan geli lahayniyo,
Ganuunaha ma loo aroora,

- **Habeenaad**

Ciyartan waxa la ciyaaraya habeenki sida magaceeda ka muuqata, oo ragga iyo haweenka labaduba way ciyaaran, isla markaana waa ciyaar sar iyo sawdba ama jiib iyo jaanba leh, waxa kale oo oo intaa dheer durbaan loo garaaco, xaga bootinta ama adinka laba jeer ayaa la gooya, waxaana heeseheheeda lagu binneeya sidan:-

Hobeeyo hobeeyo hobeeyo,

- **Muraseenyo**

Muraseenyada ayaa iyana kamida ah ciyaaraha ceerigaabada ee habeenkii la ciyaaro, waxaanay kuwa kale kaga duwan tahay xaga adinka ama bootinta oo saddex jeer la boodo ama la gooyo, waxaana kamida ah heesaheeda kuwa hoos xusan:-

Muraseenyoy hobeeyoy muraseenyoy,
Hobeeya hobeey hobeeyooy,
Saddex goyn oo sideeda u dhigan,
Saddex qarshay ku leedahy,
Muraseenyoy hobeeyoy muraseenoy,
Hobeeeya hobeey hobeeyooy,
Siddii qabcad geed ku taal taal
Oo dhagax lagaga soo qubay,
Qalalaxdii qalbigu raac,
Muraseenyoy hobeeyoy muraseenyoy,
Hobeeya hobeey hobeeyooy,
Soo seexdaayaa mooyi,
Soo sara kacaa mooyi,
Saq dhexaa wakhtigu galay**.**

- **Jaan-dheer**

Magaca jaandheer waa magac botorta iyo ceerigaabaduba wadaagaan, marka se aynu ka haadlayno jaandheer ceerigaabo waa ciyaar xaga cagta laba jeer la gooyo, waxaanay leedahay jiib iyo jaan la gooyo, heesta lagu

qaadana waxa la yidhaahdaa jiib cadaale waana tan heestii:-

Saddex waa madow tahay,
Nin la miray mugdi habeen,
Nin walaalkii meyd yahay,
Nin magaalo lagu dhacay,
Saddex banaan kala hubin,
Inaad inan saboola tahay,
Inaad soor gad leedahay,
Inaad wali sindheer tahay,
Hobeeya hobeey hobeey,
Naa geellu jeexyo doog badaneey,
Miyuu jinawga daayaayeey,
Anna caanihii jinawiyo,
Miyaan jiibta daayaayeey,
Naa sidda macawis sawsara,
Oo laydh iyo ilays taal,
Isha laguula wada raac.

- **Sidaa weeye**

Ciyaartani waa ciyaar dumarka khaas u ah, waxaanay ciyaaraan inta badan galabtii midhaheedana waxaa kamida:-

Haa sidaa weeyi,
Hobeeya hobeey hobeeyo,
Waa laba darmaanaood,
Midi deeddan badisaa,
Midina dabbaal deg badisaa,
Haa sidaa weeye,
Hobeeya hobeey hobeeyo.

3.1.3.4.2 Saylici

Saylicidu waa ciyaar loogu magac daray saylac, inanta midhaheeda samaysay waxa la yidhaahdaa mulliyo, aabaheedna waxa la yidhaahdaa sasee, sasee waxa uu ahaa hindi badhasaab ka haan jirey magaalada saylac, ku sinaan qarnigii sideed iyo tobanaad.

Ciyaartani waxa ay ka kooban tahay qaybo badanoo kala jaad jaad ah, mulliyo waxa ay ku aasan tahay saylac, waxaana siyaarta reer saylac siiba maalinta khamiista, waxaanay iyagoo lugaynaya isla markaana heesaya madaxa dabaqyo ku sita , kuwaas oo ay ku jiraan xalwad, salool, timir iyo kimis lagu dubey subag, halka qaarna ashuuno(jalxado) biyo ah madaxa ku sidaan.

Heesta ay qaadaan waxa loo yaqaana mulliyo, waxaana kamida ah midhaheeda:-

Mulliyoo hoy saasee, hoy saasee, mulliyooy saasee, hooyo hee, waxaana lagu soo goyaa heeska

Mulliyoy hoy wey kaa, wey kaa, hooyo hee.

Bayd kasta oo ciyaarta saliciga ka mid ah waxa lagu soo xidhaa.

Yackoo, yacko yackoo, yacko, cali shubbaan

Cali shubbaana waxa uu ahaa wiil aad u yaqaaney ciyaartan, kalmada (shubbaan) waa kalmad carabiya oo macnaheedu yahay dhalinyarada,

Ciyaartan waxa lagu qaadaa afar af kuwaas oo kala ah:-

1: Hindi
2: Turki
3: Somali
4: Carabi

Waayo saylac ayaa ahayd meel isku xidha qaaradaha: Yurub, Eeshiya iyo Afrika, waxaaney ahaan jirtey Dekeda ugu weyn ee ku taaley Afrikada Bari iyo Geeska Afrika, wakhtigaas.

Waxaana cadeyn loo soo qaadan karaa heestan oo ay ku calaacashey inan Reer Saylac ahayd oo jaceyl u dhimatey, mar wiilkii ay jeclayd ku maqnaa Hindiya gaar ahaan magaalada Bombey waxaaney tidhi:-

Reer suurri iyo
Reer saaxil yimide
Doonyaha bombey
Ma bir baa ku jaban.

Sidoo kale magaalada Saylac waa meeshii uu wax ku bartey kana ganacsan jirey Axmed Gurey, Hadaba hadii aynu tusaale ka soo qaadano sida ay ciyaartan uga dhex muuqdaan luuqaduha kala duwani waxa ka mida

1. Kayim badhaa, kayim badhaa, calaayey, hooyahee.

   Kalmada **Kayim Badhaa** waa kalmad hindiya oo macnaheedu yahay waanu nimid, **calaayey** waa hadal xidhiidhiye carabi ah, **hooyahey** waa eray af-soomali ah

2. Sillinbaawi yaa, sillinbaawi yaa, sillinbaawi yaa, yaa cayni sillinba

   Kalmada **sillinbaawiyaa** waa eray **Turkiya** oo micnihiisu yahay dadkii cadaayow, **yaa cayni,** waa eray **carabiya** oo micnihiisu yahay indhaheygiiyoow.

Sida loo ciyaaro

Dhamaan ciyaaraha saylicida marka la ciyaarayo si iska soo horjeeda ayaa loo joogsada, markastana labada qof ee ciyaara ayaa dhexda galla, waxaana soo hor-baxa wiilka markaas ayay gabadhuna u soo baxdaa.

Ciyaaraha qaarna laba nin iyo gabadh ayaa isku soo baxa, waana ciyaar durbaan loo tumo, sacab iyo bootina leh waxaana lagu qaadaa sara joog, waxa kale oo ay ku caan tahay in qofka heesayaa noqdo ka boodaya, waana ciyaar leh qaybo badan oo ka farcama sida:-

1. **Bismilaa salalaa**
   Bismilaa, salalaa, calaayey, hooyaa he,
2. **Mulliyoo hoy saasee**
   Mulliyoo hoy saasee, Hoy saasee, Mulliyoy saasee, Hooyo hee,
   Waxaana lagu soo sar gooya heestan,
   Mulliyoy hoy wey kaa, wey kaa, hooyo hee,
3. **Silinbaawiyaa**
   Silinbaawi yaa, silinbaawi yaa,
   Silinbaawi yaa, yaa cayni, silinba.

4. **Kayinbaadhaa**
   Kayim badhaa, kayim badhaa, calaayey hooyaheey,
5. **Kurumbaa hee**
   Kurumbaa hee, kurunbaa hee,kurunba hayaahe kurumba.
6. **Ku sugay**
   Ku sugey sagayey, ku sugi waaye, hayaahe kurumna
7. **Yackoo**
   Yackoo, yackoo yackoo cali shubbaan.

Yiwaalow:

Yiwaalow hooy yiwaalow
Yiwaalow hooy yiwaalow
Hooy hooy yiwaalow
Yiwaalow hooy yiwaalow
Waar gabadha daayey
Ragbey geel dhalley u tahay
Hooy hooy yiwaalow
Waa gabadh gayaanee
Hooy hooy yiwaalow
Ragbey gadiid u tahay
Hooy hooy yiwaalow
Waa gabadhu waa guur doon
Hooy hooy yiwaalow
Waa ragbey gayaankii tahay

Canbaruud

Wiil
Sidii canbaruudka yaa cuna oo,
la ciyaara caasha yar,

Gabadh
Sidii canbaruudka yaw u cuni laa,
Oo caasha yar la ciyaari laa

3.1.3.4.3 Dhaanto

Dhaantada sida magaceeda ka muuqata waxaad ka dareeemaysaa, inay kalmada dhaan, oo macnaheedu yahay tii ciyaaraha kale dhaantay, da'deedana waxa lagu qiyaasa Inay jirtay muddo laba qarni iyo badh ilaa saddex qarni.

Sidoo kale waxa dhaantada lagu tilmaama inay tahay curada ciyaar dhaqameedka, waana ciyaar kolba caynad gaara ah loo dheelo oo is-badalka wakhtiga iyo waayaha la socata, waxaanay asal ahaan ka soo jeeda Gobolka ismaamulka soomaalida ee loo yaqaan, **kilidhka shanaad ' zone five'** ee itoobiya inkastoo ciyaar dhaqmeeddan laga ciyaaro meelo badan oo ka mida deeganada iyo dhulka afka soomaliga lagaga hadalo.

Dhaantadu waa ciyaarta uu ' **bob marley'** ka qaatey laxankiisa ka caanka ah adduunyada, ragg iyo dumarkuba way wada ciyaaraan, waxay leedahay jiib iyo jaan iwm.

Qaabab badan iyo noocyo kala duwanna waa loo ciyaara, ciyaaraheedan waxaa ka midaa: misane, Daweyla, Qalbi lula, Rigeeya, Sida roobka, Xamdi, Dulmar, Mataan, Guuxa, Qarshe, Sareedo, Shukulo, Casriyo.

1. Daweyla (Ba' hurubo) :

Waa ciyaar ka mida faracyada dhaantada, haddaynu tusaale ka soo qaadanno qaar ka kamid ah jiibteeda waa sidan:-

Ba' hurubo kurubadaydaay,
Nimaan toban boodin,
Miyaa timirooy talo lala wadaaga,
Sariir madhaniyo,
Surmaa na dishee,
Sinyoorow mar siinka noo celi.

Inaan wali sii horleeeyo,
Oon habaabey ii sheeg,
Hooyadey saxiimadda,
Waalan bay wadataa,
Wanaag anna waardiyaan galay.

2. Qalbi Lula:

Waa ciyaar kamida ciyaaraha ku abtirsada dhaantada, haddaynu tusaale jiibteeda ka soo qaadanno, waxa kamid ah kuwan:

Ee hallaale qalbi lulaa,
Ee hallaale qalbu lulaa,
Intani waa dalxaynta maansada,
Intani waa dedaalka maansada,
Waxaan dooni gabadh da'deyda ah.

3. Rigeeye :

Waa ciyaar kamida ciyaaraha dhaantada, waxa wada ciyaara willal iyo gabadho waa ciyaar jaanteedu badan tahay isla markaana jiib leh, jiibteedana waxa kamida:-

Inuu udubkeenu adkaaadaa,
Ilaala aroori noo iman,
Inaan arbayow la oof jarin,
Ilaahay uun baan baruyaynaa,
Aamiin dhaha ohoow.

Hibaaqa sideed udgoon hella,
Adoo hidihiyo hubkii xidhan,
Adoo hufinyaa dhaaclaha,
Haweeyaay hortayda kaalay.

4. Xamdi :

Waa ciyaar kamida ciyaaraha abtirsiintoodu ka soo jeedo dhaantada, waana ciyaar jiib iyo jaan wadata luuqdeedana waxa kamida:

xamdi weeyoo,
taniyo xamar,
gaadhigu xiin.

5. Sida roobka:

Iyana sidoo kale waa farac kamida dhaantada, waa ciyaar jiib u badan laakiin jaanna wadata, waxaana kamida jaanteeda:-

Sida roobka sida roobka, Allah heedhee,
Raaxeeya adduunow, Ha heeliyooloow.

6. Dalmar:

Waa ciyaar kamida ciyaaraha dhaantada, waana ciyaar leh jiib iyo jaanba, waxaana jiibteeda kamida kuwan soo socda:-

Dulmareey deelka maanso,
Helliyo heeliyaalow,
Digadaannu tumaynayee,
Helliyo heeliyaaalow,
Markan waan ku daallee,
Helliyo heeliyaalow,
Allaa idilee I daaweeyey,
Helliyo heeliyaalow.
Waan ku daydayayee Degmooy,
Daw ma kaa helayaa Degmooy.

7. Mataan :

Waa ciyaar kamida ah faracyada dhaantada, waan ciyaar ku caana jiib iyo jaan is wata , jiibteedana waxa kamida:

Mataaanteydiiyeey soo mar meesha,
Mataanteydiiyeey geella magaca weyn le,
Mataanteydiiyeey lo'da midhaha badan,
Mataanteydiiyeey malyuumaad lacaga,
Mataanteydiiyeey mulki baan ku idhi

8. Guuxa :

Waa ciyaar kamida faracyada dhaantada, waana ciyaar u badan jiib laakiin jaanna way wadataa, midhaheedana waxa kamida:

Sida eryo geel,
Ilma laga dilaan,
Igadh kuu ahee,
Adna ila ogoow.

9. Miisane :

Waa ciyaar ku abtirsata dhaantada waana ciyaar farshaxanimadeedu ciyaareed aad u sarayso, jiib iyo jaanba way leedahay, jiibteedana waxa kamida:-

Hanaan qurux wanaageey
Naftaan kuu hibeeyee,
Caruurtoon habynoo
Hidde iyo dhaqankeeni hooyaan,
Hilinkii loo marayey haynaa.

10. Qarshe:

Waa ciyaar kamid ah faracyada dhaantada, waxaaney ku jirtaa ciyaaraha ugu caansan ee dhaantada kamid ah, waa ciyaar jiib iyo jaanba aad u heer sarreysa leh, midhaheedana waxa kamid ah:-

Waa qarshee qarshe weeyee,
Qalbigu armuu naga qarxaa

11. Shukulo:

Waa ciyaar ku abtirsata ciyaaraha dhaantada, waxaana wada ciyaara rag iyo dumar, heeseheeduna waa kuwan:

Shukulada iyo sheekha dhaantada,
Shareecada wey yaqaanaan

12. Casriyo :

Waa ciyaar dhaanteeda laga ciyaaro deegaanka gabiley iyo nawaaxigeeda, rag iyo dumar ayaa wada ciyaara, waxaaney leedahay jiib iyo jaan, inamadu garbahay is qabsanayaan saddex jeer baana la boodaa laba laba ayaana codkana la isku raaciyaa, luuqdeedanana waxa kamida midhahan hoos ku qoran:-

Wiilka
Naa casriyo waynagii ciyaari jirnee,
Calaamaddu caawa waa canabeey.
Gabdhaha
Waar casriyo waynagii ciyaari jirnee,
Calaamaddu caawa waa caliyeey.

3.1.3.4.4 Saar:

Saarku waa mid kamid ah ciyaaraha hidaha iyo dhaqanka ah, waxaanu ku jiraa kuwa ugu caansan ee gobol kasta oo ay soomaalidu dagto laga ciyaaro, waana ciyaar loo adeegsado hab iyo hanaan ka duwan ciyaar dhaqameedada kale, sababtoo ah isaga waxa loo adeegsadaa nidaam Rooxaaniya.

Waxa uu leeyahay durbaan iyo sacab loo garaaco, sidoo kalana waxaan iyana ka madhneyn qaybta kale oo loo yaqaano sar iyo sawdka, oo waxa uu leeyahay murti iyo heeso badan oo loo qaado, inkasta oo midhaha lagu qaada kala duwan yihiin, hadadna magaciisu waa saar uun, wallow ay jiraan midhadh tiro yar oo iyagu magac kale qaata sida: Baarcade, Mingid, Boorane, Haan, iwm.

1. Saar Gedo :

Waa ciyaar kamida ciyaaraha ay caanka ku yihiin deegaanka Gedo, waxaan wada ciyaara hablo iyo wiilal, ninku isaga oo sida awrka guuxaaya oo mindina sita ayuu gabadha sanka ka mariyaa, kadib wuu suuxaa. Waana jiib iyo jaan wada socda, jaanteeduna waa talantaalli wiilal iyo gabdho dhexmaraysa, waxaana kamida midhaheeda:-

Wiilka

Nimaam tagin taalayaal
Talxida caanaha ku shuban
Talxaan ahay sees ku yidhi

Gabadha

Waligay bariis maanan cunin
Banaadirna manaan tagin

Bidhaa caano laygu shubay
Boodadudu way kugu yartahay.

2. Saar Baydhabo :

Ciyaartani waa ciyaar saareed, waxaana laga ciyaara deegaanka Baydhabo, waxaana loo kala saaraa saar lugeed iyo saar mooye, waxaana wada ciyaara rag iyo dumar ciyaartu waa fadhi iyo taagniba, ka tumayaana wuu fadhiyaa dadka ciyaarayaana way taagan yihiin, heesaheedana waxa kamida:-

Geel haduu arooro
Arooruu aato aado

3. Saar kismaayo :

Waa ciyaar aad caan u ah marka la heesayana waa layska guraa oo kolba qof ayaa qabsada sawdka, haddii kale waxaan lahaa buu ka kalena odhanayaa, dumarkuna waxay kaga daba jiibiyaan runtaa iyo haaheey, waxaana caan ku ahaa oo lagu xasuustaa abwaankii weynaa ee **Carays Ciise,** waxaana laga ciyaara deegaanka kismaayo, waxaana kamid ah heesaheeda:-

Habeenkii xalayto galay
Dundumooy waan kula hadlaa,
Dadkana qaar wuxuu yidhaa,
Armuu mas kugu dilaa,
Haddana kaama durkee
Dushaadaan yuururaa,
Oo dundumooy waan kula hadlaa.

4. Haan:

Waa ciyaar lagu ciyaaro fadhi, gabadh baa tumaysa, haan afka laga gooyay oo qoriya idinna lagu xidhay, gabadhaa heesaysa oo la dhagaystaa, midhaheedana waxa kamida:-
Waa ina saar fadhi.

5. Mingiska :

Waa ciyaar saareed ka mid ah bahweynta saarka, waxaana laga ciyaara deegaanada koonfur barri, waxa wada ciyaara hablo iyo wiilal waxa la tuurayaa maryaha, waxaad mooda qaabka ay u ciyaarayaan in uu jin ku jiro, waxaana kamida midhaheeda kuwan hoos ku qoran:-

Maamaa u weyneey,
Waar saar maamaa u weyneey,
Mingiska maamaa u weyneey,
Waar maamaa madaxa daayeey,
Saaroow awoowe soo dageey,
Aan kula socdaale soo dageey.

6. Baarcade :

Waa ciyaar laga ciyaaro Gobolada Soomaliland Hargaysa, Togdheer, Awdal, Saaxil iyo ceerigaabo, waana ciyaar saarka la hal-maasha oo Raggu ciyaaraan, ninka baar-cadeeyaana waa nin inta badan caan bax ka noqda deegaankiisa.

Waxaana si dhaba looga dareema inuu yahay mid jibbaysan oo dhangad iyo waxyaabo lamida qaata.

Marka Rooxaantu jibbaysan ee Baar-caduhu ku kacdana waxa uu doona in giddi habeenkaas u jiibiyaan, isagoo la dhex qaadaya dhengad qawlaladana ka xunbaynaya, waxaana kamida midhaha Baarcadaha kuwan:-

Hiyeeleeley hiyee, Haa haa,
Hiyey laba hoobiwa, Haa haa,
Habluhu gaagaabanaa, Haa haa,
Ma gudin baa lagu sar jaray, Haa haa,
Ma galab bay wada dhasheen, Haa haa.

7. Boorane.

Booranaha waxa laga ciyaaraa Gobolada ama Magaalooyinka Banaadir, Jawhar, Kismaayo, Marko, Bu'aale, Jilib, Xudur iyo Baydhabo, waana ciyaar caan ka ah Koonfurta soomaaliya, midhaheedana waxa kamida:-

Hawbaa hilowloo,
Bogiyo beerkay jareenoo,
Waa soo degaynaa,
Bulshooy waa soo degaynaa.

3.1.4.5 Botor (Batar)

Waa ciyaar kamid ah ciyaaraha soomaalidu ciyaarto ee ay hidaha u leeyihiin, waa ciyaar caan ah oo laga ciyaaro soomaaliland.

Waxaanay u kala baxdaa laba qaybood oo kala ah jaan-dheer oo laga ciyaaro Oogada sare ee Gobalada Hargaysa iyo Burco, iyo qaybta labaad oo loo yaqaano jaflo oo laga ciyaaro iyana Waqooyiga labadaa Gobolee kor ku xusan, midhaheedana waxa kamid ah:-

Botor waa nin bawsadey,
Nimuu beerka kala baxay,
Nin bartiisa dhaafsaday,
Afartiinan boodo xun,
Waydin kala badalayaa.

3.1.3.4.6 Hoobaalow:

Waa ciyaar soomaaliyeed caan ka ah Gobolka togdheer, waana ciyaar ay wada ciyaaraan ragga iyo dumarku, jiibteeda iyo jaanteedana wadata, waxaana ka mid ah midhaheeda:-

Aa hoobalow ha helleyaalow,
Hoobiyaaleyeey hodaneey,
Dayaxii bil koowaad,
Daba joogihii dhace,
Daylo nayshii uma cayin,
Nin waliba dan faallee.

3.1.3.4.7 Hiirimaahe:

Ciyaar soomaaliyeeed caan ah, waxaana laga ciyaara hargaysa nawaaxigeeda, waxaana ciyaara dumarka oo kaliya, waana ciyaar wadata jiib iyo jaan, waxaana lagu ciyaara sara joog, mararka qaar jilbaha ayaa dhulka la dhigtaa, waxaana kamid ah jiibteeda:-

Sidaasaa loo habeeyaa
Sidaasaa loo hagaajaa
Sidaasaa loogu heesaaye
Hariimaahee hanahabow hanahabaa.

3.1.3.4.8 Shirib:

Ciyaartan waxa laga ciyaaraa Xamar, Balcad, Jawhar, Ceel buur, Mahaddey ilaa xeebta, fadhi iyo sara joogba waa lagu ciyaaraa, ragga iyo dumarkuna wey wada ciyaaraan, waxaana la ciyaaraa xiliyada barwaaqada, nabadeynta, shirarka qabiiladda, kaftanka iyo haasawaha dhalinyarada.

Waxa ay raggu qaataan labba go' oo cad cad, Toorey, Waran iyo Gashaan.

Habluhuna sidoo kale wxay qaan jireen saddex qayd, dhacle, iyo timaha oo ay xamradaan, waxa kale oo intaa dheer in wiilashu gacmaha gashadaan laba qori oo la isku garaaco, sar ahaana geeraarka ayay isku dhow yihiin.

Tusaale :

Markii cabdi rashiid raysal wasaaraha laga qaadey ee cabdi risaaq xaaji xuseen loo dhiibey, shiribkii lagu shirbey wuxu ahaa 1964,

Arre rashiid ka qaad,
Oo risaaq u dhiib,
Inta kale ma rootibaa.

Markuu shirkii imbigaati Muuse Suudi Yalaxow tagayey ayay tolkii shirib kula sii dardaarmeen, waxaaney yidhaahdeen;-

Arre Muusa Suudii Yalaxaow,
Mina kiiniyaa aadoo,
Mini kiblgaad aragtoo,
Arre kursiga kowaad nooga keen,
Minaad ka weydoo,
Kursiga labaad nooga keen,
Minaad ka weydoo,
Arre ka soo kud,
Kuraanku Geel ma karsantee,
Kobtanaan ku sugeynaa,
Aan ku kuudadinee.
Cabdi Qaasin Salaad Xasan (ina salad boy), isna sidoo kale markii la doortey waxa loo tiriyey shiribkan.
Arre ina Salaad Boy,
Baladka anagaa iska leh,
Minaad Bir noqotanam,
Waa ku baal galleynaa,
Minaad bac noqotana,
Waanu ku baajineynaa.

3.1.3.4.9 Guurow:

Guurowgu waa ciyaar laga ciyaaro Xamar, Balcad, Jawhar iyo Ceel buur, Ragga iyo dumarkuba way ka qayb qaataan.

Waxaanu xaga hab dhaca iyo xaraf-raac la wadaaga gabeyga, hase yeeshe waxa uu kaga duwan yahay, xaga Hooriska iyo Hoojiska, isku luuqna maaha, halka

guurowgu ciyaar ka yahayna gabeygu ciyaar maaha, xaga caannimadana gabeyga kalama sinna.

Haddaba hadaynu tusaale ka soo qaadanno ereyada guurowga waa sidan hoos ku xusan:-

Idinkiyo kuwii dhacay, wax isma dhaantaane
Asaxaabul fiil wixii dhibey, idinma dhaafaane
Dhawda idinku gure, Shimbiro dhagaxyo haystaaye.

3.1.3.4.10 Wallo saqo:

Waa ciyaar ka mid ah ciyaaraha ay soomaalidu ciyaaraan, waxaana laga ciyaara jiidha balaadhan ee u dhaxeysa gaalkacayo ilaa xamar, waxaaney isku dhaw yihiin ciyaarta kale ee loo yaqaano Botorka.

Waa ciyaar caan ah oo ay Ragga iyo dumarkuba wada ciyaaraan, kolka la boodayo waxa isku baxa wiil iyo gabadh, qofka heesayaana isagu ma boodo.

Hadaba haddii ay wax ka sheegno heesaha lagu qaado waxa ka mid ah:

Tusaale:

Wiil
Weey weey weey
Gabadh
Waa ware soo daa
Wiil
Weey waxaan caawa u imid,il
War doon baan ahay,
Inan waki dhalley,

Reer koodu wacan yahay.
Gabadh
Weey waa wareey,
Haddii aad war doon tahay,
Inan wali dhalley,
Meeshay kaa xigto warayso

Wiil
Weey waagi xalley,
Socodkii wiglada,
Waxaan xalleyto soo marrey,
Innad iga war roon tahay,
Weedhaale cal iyo,
Wehelkaaga waydii.

3.1.3.4.11 Riixo:

Waa ciyaar si goobo ah loo ciyaaro, oo hadba labada qof ee isla boodayaa uun dhexda galaan, waxaana badiyaa laga ciyaara deegaanada Diridhaba, Ashca, Geerisa iyo meelo kale waxaana ka mid ah midhaheed:

Hadaanan riixo kaa tuman,
Hadaanan ruuxa kaa bixin,
Roor roor baad baratee.

3.1.3.4.12 Jaflo:

Waxa laga ciyaara gobolka gal gaduud waana ciyaar caan ah oo ragga iyo dumarkuba ciyaaro, waxaana midhaheeda ka mida:

Jafleey jafleey,
Jafleey jafleey,
Jawharad la moodyey,
Jidhkaygaa ku tabayee,
Ii jawaab

3.1.3.4.13 Dawlad damin:

Waxa laga ciyaara Gobalka shabeelaha Dhaxe gaar ahaan Caryaalle, waana ciyaar raga iyo dumarkaba ka dhaxaysa oo lawada ciyaaro.

Tusaale:

Dawlad damiinka,
Dabada bacaadka,
Caryaalle.

3.1.3.4.14 Dillo kibiiro:

Ciyaartan waxa laga ciyaara gobalada wabiyada khaas ahaan Caryaalle ilaa Mahaddey, waxay leedahay jiib iyo jaan, rag iyo haweenbana waa la dheelaa.

Tusaale :

Kuwii diirta xadee,
Aa ma la soodayaa,
Kuwii diirta xadee.

3.1.3.4.15 Bullo:

Waa ciyaar soomaaliyeed, waxaan laga ciyaara Gobalada koonfur Bari ee soomaaliya gaar ahaan deegaanka Qallaafe, waxaaney caan ku tahay jiib oo kaliya, mana laha jaan, waxaana wada ciyaara rag iyo dumar, qalabkeedana waxa kamid ah, Buun, Bir iyo Darguugad, midhaheedana waxa kamid ah:-

Rubbooy hoobeey,
Sida raan yar guuraysa,
Rubbooy hoobeey,
Herimaahee makuu yeedhaa,
Heley hooyaa heehaa.

3.1.3.4.16 Surrow

Waa ciyaar kamida ciyaaaraha ay ciyaarto soomaalidu, waxaana laga ciyaaraa, Gobolka Banaadir waa ciyaar jiib iyo jaan wadata, waxaana wada ciyaara rag iyo dumarba. Waxaana heesaheeda ka mida ah:

Himilooy wayaabee wayaabe,
Hidahaygu waa geed had hadhweyn,
Waa dhaqan hagaagsanoon habaabin,
Wanaag laygu habeeyoo habaysan.

3.1.3.4.17 Xayaad

Waa ciyaar kamida ciyaaraha soomaalida, wayna ka duwan tahay qaab ciyaareeddadan aan kor ku soo

sheegnay dhamaantood, waa ciyaar aan lahayn jiib iyo jaan, iyo cod midnaba, wiilasha ayaa iyaga oo aamusan hablaha jeedal la dhacaaya waana la fadhiyaa.

3.1.3.4.18 Aw batiikhow:

Waa ciyaar ridmi leh oo aan lahayn sar iyo sawd midnaba, waxaana la garaacaa durbaano waa weyn, waana ciyaar banaadir.

3.1.3.4.19 Shab-shable:

Waa ciyaar soomaaliyeed oo caan ka ah deegaanka Gobolka Banaadir, waana ciyaar wadata sar iyo sawd, waxaana la garaacayaa durbaan yar, midhaheedana waxa kamid ah:

Shab shabloow shiinka quraanka,
Shan nimaan haysan ma showro.

3.1.3.4.20 Shoobo:

Ciyaartan waa ciyaar soomaaliyeed, waxaana lagu ciyaara gobalada dhexe Baladweyn, Dhuuso mareeb, Gaalkacayo, waxaana wada ciyaara rag iyo dumar, ragu ma hadlo ciyaartan, laakiin mar ayuu gacmaha fidiyaa, marna lawga ayuu laabayaa, waxaana inta badan la ciyaara xiliyada aroosyada iyo barwaaqada. Midhaheedana waxa kamid ah:

Himbishaa himbishaa.

3.1.3.4.21 Sayla:

Waa ciyaar kamid ah ciyaaraha ay soomaalidu ciyaarto, waana ciyaar laga ciyaaro Deegaanka Banaadir, waa ciyaar radmi iyo durbaan xooggaan leh aadna loo boodo, waxay kuwada hadlayaan dareen muujin oo kolba kooxbaa aad u boodaysa. Erayadeedana waxa kamid ah:

Saylaay saylaa saylaay.

3.1.3.4.22 Wareegey

Waa ciyaar soomaaliyeed, oo laga ciyaaro Banaadir raga iyo dumarkuba way wada ciyaaraan, waxaaney leedahay sar iyo sawd, waxaana lagu ciyaaraa ridmi iyo booto, midhaheedana waxa kamid ah:

Oohow oohow wereegtayeey,
Wareegtayeey waari maayo

3.1.3.4.23 Shab-shaba:

Waa ciyaar kamid ah ciyaaraha soomaalida, waxaana laga ciyaaraha deegaanka Banaadir, Nin iyo gabadh ayaa kolba dhexda ku wareegaya, sawdna malaha ee waa ciyaar kaliya.

3.1.3.4.24 Wiiro-wiiro:

Ciyaartan waxa laga ciyaara Banaadir, ulbaa la isku garaacaa, waxaaney aaminsan yihiin haddii dhiig la iska keeno inuu roob da'ayo mana laha heeso dhaadheer ee waxa la yidhaahdaa sidan:

Wiiroow wiiroow,
Wiiro wiiroow

3.1.3.4.25 Jiifto:

Jiiftadu waa qayb kamid ah maansada, waxaaney leedahay xaraf-raac iyo miisaan, waxaaney la hal maashaa heesta, gaar ahaan hees ciyaareedda loo yaqaan botorka, waxa kale oo ay isku mid yihiin oo ay sarta, miisaanka iyo xaraf raacaba wadaagaan masafadda.

Jiiftada waxa aynu tusaale uga soo qaadan karnaa, maanasadii Hadraawi ee Daalalley:

Marka hore dad baan ahay
Dad dad reebay baan ahay
Duni dhalan rogtaan ahay
Hadba fadal durkaan ahay
Da'da'deed u talisoo
Ugu damac fog baan ahay

3.1.3.4.26 masafo:

Masafada haddaan tusaale ka soo qaadanno, waxa inagaga filan maansada dawo ee diwaanka samo doon ku jirta.

Ninkastoo la doortoo
Darajiyo xil qaadoow
Ninkastoo la doortoo
Dusha maamul saarow
Ninkasta oo la doortoo
Mansab loogu deeqow

Dalka fiiri aashaa
Dacalada ka jeedaal
Kolba dacal ka faallee
Dadnimada ku saameel
Gobinimo ha deeqee
Daacadnimo ku heensee
Bulsho keeda taag daran
Ka yaboohi darajaad
Danyaraha miskiinkiyo
Dulmanaha is weydii
Isagaa ku doortee
Waxa loogu dawgaley.

Maamulka

Ummada soomalidu waxa ay lahayd maamul, deegaan kasta waxa uu laha odayaal u maamula oo la daba fadhiisto, haddii ay noqoto garta, iyo maamulka kalaba

Magacyada maamulka lagu magacaabi jirey waxa kamid ahaakuwan:-

- **Ugaas**
- **Boqor**
- **Garaad**
- **Caaqil**
- **Jii-Caaqil**
- **Wabar**
- **Malaaq**
- **Duub**
- **Islaan**

Deegaano kala duwan ayaa laga isticmaala magacyadan maamulka, tusaale ugaas waxa laga isticamali jirey deegaano gaara.

HU'GA

Raggu waxa uu xidhan jiren laba go, Dumarka waxa ay weey xidhan jireen

- ✓ Garays
- ✓ Saddex qayd
- ✓ Boqor
- ✓ Dhacle
- ✓ Derey-muus

GARTA

Garta waxa ay xeerbeegti u qaybin jirey qodob,waxaan kamid ahaa qodobadaa:



Mooro

- Falku sida uu u dhacay ayaa la yidhaahdaa kas ama kamma.
- Labada qof ee is haysta ayaa la kala yidhaahdaa muducu ama mudaaclaay, amase reebe ama raacshe.
- Waxa lagu kala baxo ayaa la yidhaahdaa millad ama marag, milladu waa dhaar halka lagu kala baxayo haddii kale markhaati.

Ummada soomaalidu waxay lahayd dhaqan soo jireen ah, kaas oo ku salaysan diinta iyo nolasha. Wakhti xaadirakan aan joogno maanta dhaqankii ay ku faani jirtay ummada soomaalidu gabi ahaanba wuu ka baxay meesha, kaas oo ay u sabab tahay ku dayashada dhaqannada dadka qalaad.
Bal aan soo qaadano maansadan ka waramaysa dhaqanka, waxaanay ku bilaabmatay sida tan:-

- Anoo xalayto gurigiyo
- Gogasheyda jiifoo
- Huradada gowda ku hayaa
- Dhaqankii oo gudayaa
- Garaadoow I idhi toos
- Garta ila gal buu yidhi
- Googaynay hadalada
- Waxa uu yidhi garaadow

- Adiga iyo guntiinani
- Idinkaa igooyoo
- Dhaqan reer galbeedbaa
- Booskaygii dagayoo
- Gafaad iga gasheeniyo
- Godobaan tirsanyaa
- Caawa geedibaan ahay
- Galbadee nasiibkay
- Gabal dhaca ihaystiyo
- Gabayaxooga dhaxantiyo
- Gudcur maarro rawlaha
- Goblanka iyo gaajaada
- Durxumada goshaydiyo
- Guudkayga saarani
- Gafaad iga gadsheeniyo
- Godobtiina weeyaan
- Caawa geedibaan ahay
- Galbadee nasiibkay
- Kuwa inaan gumoobiyo
- Jecel geeridaydiyo
- Godka ii qodayoow
- Inta habar dugaagiyo
- Aarka gooni daaqiyo
- Bahalaha gurguurtiyo
- Goodkiyo abeesada
- Ii loogay cadowgoow
- Godobaan tirsanyaa
- Caawa geedi baan ahay
- Galbadee nasiibkay

- Dameerihii guyaal badan
- Guudka laga rarraaye
- Heeryada gumaysiga
- Guud saaray aadmiga
- Yidhi aan ka gudubnoo
- Gayigaba ka guurnoo
- Maanta galab carownee
- Geediga inoo rara
- Waxay guuro bahalayn
- Habeenkii guduudiyo
- Hadba geedo jiidhaan
- Marki waagii galac yidhi
- Beeshu ay ka guurtee
- Guul darada iyo ciilkii
- La gurxaamay baan ahay
- Gafaad iga gasheeniyo
- Godobaan tirsanayaa
- Caawa geedi baan ahay
- Galbadee nasiibkay
- Gabagabada sheekada
- Hadalkii kusooo goo
- Furimaaayo geediga
- Jeeroon goob doogliyo
- Helo guri barwaaqa ah
- Aniguna garwaaqsaday
- Xaajada gun iyo baar
- Gafku inuu enega yahay
- Dhaqankeenii guuree
- Laga galab caraabee

- Dadkii gaarka u lahaa
- Gabi dheer kalaliyee
- Lagu tuuray goofkaan
- Galiilyada ihaysiyo
- Maansaan gingimayoo
- Waxan idhi ganey iyo
- Abwaanintii guune
- Gabaygiyo heestiyo
- Gibladiyo ciyaartiyo
- Geeraarka maansiyo
- Guurowga tiriyoow
- Soomaali gabigeed
- Anigoon kala gurin
- Gacal iyo sokeeyaba
- Aaway dhaqankii guunkee
- Gaarka u lahayniyo
- Hablihii garayskiyo
- Xidhan jirey guntiimada
- Gibisha iyo loolkiyo
- Cawskiisa gaariyo
- Googoos sameyn jirey
- Raggii laba go iyo waran
- Gaashaanka sidan jirey
- Hol weyn geela dhaqan jirey
- Marka uu gu'gii da'o
- Gaado weyn barwaaqa
- Ina goray ku dari jirey
- Galoofta iyo qaalmaha
- Intay gaaso bixiyaan

- Gaydhada maqaarka leh
- Gawaaha u culi jirey
- Garab rarato noqon jirey
- Aaway dhaqankii guunkee
- Gaarka aan u lahayn
- Marka gololo reer dhalay
- Geesigii u hawoodee
- Guurku uu ka doone
- Talo ay gorfeeyeen
- Gadhcastiyo odayaal
- Guurtida iyo waayeel
- Geed intay fadhiisteen
- Hablihii gu'gii hore
- Laga bixiyey guunyada
- Guulahay horseedeen
- Kaftan aan gadaafiyo
- Guul-guul lahayniyo
- Haasaawe gogoleed
- Goobta ay ka mariyaan
- Gabagabada sheekada
- Gacanqaadku uu dhaco
- Gobtinu ay ku xididoo
- Gabaatiga iyo yaradka
- Gamaanka iyo fardoodiyo
- Goobanaha qoriga iyo
- Guunyada teeda wacaniyo
- Geel la isku siin jirey
- Aaway dhaqankii guunkee
- Gaarka aynu ulahayniyo

- Gaafkiyo arooskii
- Dhalinyaro is guratoo
- Aqoon guule siiyoo
- Ku hagoogan dhaqankii
- Aqal goonyo weyna ah
- Inta ay soo gangamaan
- Sida gob iyo caadkeed
- Galbis iyo mashxaradiyo
- Sacabada ay garaacaan
- Afkeenii gobta ahaa
- Hal-xidhaale gaariyo
- Maansooyinkii guba
- Soorteeni garashiyo
- Gashiin ugu wacnaydee
- Marti goor xun socotiyo
- Magaynada lasiin jirey
- Away dhaqankeeni guunke
- Gaarka aynu ulahayn
- Waxba yaanan geeraar
- Ku gadoodin ciilke
- Dhalinyarda goonyaha
- Gayigayga joogtay
- Dhaqankeenan dabar go'ay
- Yaan uga ergoodaa
- Garta yaynu siina
- Tolow yaa ia kala guri.

QIIMAHA AQOONTA

Waa Maxay Aqoontu?

*Sidaa la isku wada waafiqsan yahay aqoontu waa furaha nolasha.***(aqoon la,aani waa iftiin la,aane)**

- **Aqoontu waa iftiin**
- **Aqoontu waa ilwaad**
- **Aqoontu waa af-garad**
- **Aqoontu waa awood**
- **Aqoontu waa itaal**
- **Aqoontu waa irmaan**
- **Aqoontu waa ardaa**
- **Aqoontu waa akhlaaq**

Sidda aynu wada ogsoonahay haddii aynu ka jawaab bixino qiimaha aqoonta kuma soo koobi karno qoraal, waayo sababtoo ah waxa la isku wada raac san yahay ina ay aqoontu tahay laf-dhabarta nolasha aadmaha.

Qiimaha ay aqoontu u leedahay nolasha aadamaha waa mid aan la qiyaasi karayn. Sida qur'aanka kariimka ah uu Alle inoogu sheegayna in aanay sinayn qof aqoon leh iyo qof jaahil ah.

Aqoontu door muhiima ayay ka ciyaarta nolasha aduunka aynu ku nool nahay, sababta oo ah waxa aynu wada dareen sanahay dadyowga aduunku inay maanta iskugu baanan aqoonta; iyagaoo dhamaan wadanba

wadanka uu kaga horumarsan yahay xaga aqoonta uu dhinaca walba kaga wanaag san yahay.

Saameyn Intee Le'eg ayay Aqoontu Ku Leedahay Nolasha Adaamaha?

Aqoontu saameyn weyn oo laxaad leh ayay ku leedahay nolasha aadamaha.
Marka aanu qofku aqoon diiniya ama mid maadi ah midkoodna lahayn waxa uu lamid yahay geed bilaa laama ah.
Haddii aanu geedku lahayn laamana ma yeelan karo caleemo, haddii aanu geedku lahayn caleemana ma yeelan karo hadh, taa macnaheedu waxa ay tahay haddii aanu qofku lahayn aqoon, nolashiisuna waxa ay noqonaysaa mid bilaa qiima ah oo aan munaafacaad lahayn.

Haddii uu qofku leeyahay cilmi waxa uu qofkaasi ka dhigan yahan sida geed la hadhsado oo lamanaafacsado, siiba geedashu iskuma jiraane geedka loo yaqaan Gobka, oo isagu qiima weyn leh. Aqoontu waxa ay kaa dhigaysaa qof xadaari ah oo nolasha fahansan.Waxa aynu wada ognahayn maanta heerka ay marayaan wadamada reer galbeedku, horumarkasta oo ay gaadheen waxa ay ku gaadheen waa aqoon.

Wax ma ka badashay aqoontu umadda soomaalida?

Odhan kari mayno wax kamay badalin oo maalinba maalinta kasii danbaysa waxbaa la odorasayay, laakiin sidii ugu haboonayd ee la rabay aqoontu waxba ugamay badalin.
Ilaa caqabadahaas la dhaafana lagama yaabo inay wax muuqda oo la taaban karaa is badalaan.

Bal aynu tilmaamno caqabadahaas horyaala qaar kamida:-

- Tayada aqooneed oo liidata.
- Goobaha aqoonta lugu barto oo aan daryeel hagaagsan ka jirin.
- Tirada jaamacadaha oo batay,siibakuwa gaarka loo leeyahay,taasina waxa aykeentay maaddaama ay tiro bateen in ay tayadooda aqooneed yaraato.
- Aqoonyahannada wax bartay oo aan ahayn qaar aan kaba fikir umadooda iyo dalkooda, laakiinse muhiimaddoodu tahay uun sideed magac, lacag iyo sumcad u heshaa.
- Bulshada oo aad mooddo inay aanay wali dareen sanayn qiimaha ay aqoontu u leedahay nolashooda.

Waa Maxay Sababta Ay Aqoon-Yahanada Caalamku Ay Horumar Ugu Sameeyeen Bulshadooda, Laakin Ay Aqoon-Yahanada Soomalidu Horumar La Taaban Karo Ugu Horseedi Waayeen Bulshadooda?

Isbadal marka la samaysanayo dunida waxa laga maarmaan ah in arimo badan maanka lagu hayo si halka la rabo loo gaadho.

Sababta ugu weyn ee ay aqoon-yahanada aduunku u dhaafeen aqoon-yahanada soomaalida waxa weeyaan iyagoo arimo badan ka shidaal qaatay, tusaale ahaan ugu horeyn inta aanay wadamadooda waxba ka badelin waxa ay eegeen oo ay is weydiiyeen maxa khaldan oo u

baahan in la saxo, taasi oo ay daraasado badan ku sameeyeen kadibin ay xal u heleen.
Baadhi taano qoto dheer kadib waxa ay aqoon yahanadu isla meel dhigeen dhibaataooyinka jira. Iyaga oo kadibna mid mid isku dul taagay isla markaana diwaan galiyay oo dhamaan dhibaatooyinka ka hortaagana horumarka hubsaday.

Geesta kale dhigooda aqoon yahanada soomaalidu wali may samayn daraasad dhamays tiran oo diwaan gashan (***Research paper***) taasi oo ay dhibaatooyinka wadankooda haysta xal ugu heli lahaayeen, tusaale ahaan majiro qoraalo dabacan oo lagu darasadeeyo jamacadaha.

Markasta waxa ay aqoon-yahanada caalamku maaankooda ku hayaan in aanu isbadalku dhakhso ku iman, sidaa darteed waxa ay hadh iyo habeen ku foogan yihiin arimaha cilmi-baadhista ay ku wadaan iyaga oo aan marnaba ka caajisayn.

waxa jira is-kaashi buuxa oo ka dhaxeeya aqoon-yahanada iyo dawladooda, arimaha ugubka ah ee ay soo saran waxtarna u leh umada iyo wadankaba waa la yeela, waxa ayna dawladu ku dhaqaaqda fulinta iyo awaamiirta aqoon-yahanada, dhinaca kale way yar tahay aqoon-yahan soomaaliyeed oo si mutadawacnimo ah u sameeyay cilmi-baadhis taas oo ku salaysan aqoon taabanaysa waaqica jira (**scientific Research**) islamarkaana usoo gudbiya jaamacadaha si ay u noqoto buugg-aqooneed**(publication**) ardayda u noqda Tix-raac, sidoo kale dawladuna haba yaraatewakhti ma siiso arimahaas.

TAYADDA AQOONTA

Guud ahaan gayiga soomalida waxa jira jahli. burburki dawladii la odhan jiray soomaliaya ayaa keenay in gabi ahaanba in ay wax walbaaba burburaan, kacaanka ka hor dabcan iyo muddadii aydawladadu jirtay waxbarshadu aad ayay u fiicnayd dalkuna waxa uu noqday meelaha aduunka ugu fiican, hase yeeshe burburkii dawladii soomaliya waxa meesha ka baxay aqoontii gabi ahaanba oo noqotay jaanta rogan.

Burburkii ka dib, waxa batay goobihi waxbarashada waxaana hadana hoos udhacay tayadii waxbarashada aqoonyahanada soomaalidu badankooda umay badalin aqoontii camal sababtoo ah waxa saamayn ku leh deegaanka taas oo keentay in aqoonyahandu waxba ka badali kari waayaan wadanka sidaa awadeed aqoonyahanda soomalidu horumar la taaban karo kumayn samayn tayada aqoonta, iskadaa inay ku soo kordhiyaan horumare waxa ay ku tagri falaan masaakiinta tusaale waxa dhacda aqoonyahanada kuwooda loo yaqaan dhakhaatiirta inta ay furteen dhakhtaro, haddana aanay gargaarsiin bulshadooda ilaa lacag ay dhigana lagama yaabo in wax loo qabto. waxa ay bulshooda ula dhaqmaan sida dad ajaaniba oo aan diir naxaaba ugu oolin,waxa loo keena hooyo dan yara oo umuli wayday aduuna lagu qalana aan haysan, lagama yaabo in ay gurmad u fidiyaan labadaa nafood

ee tabaalaysan, ilaa aad lacag horta ka bixisana lagama yaabo in u gargaaraan.

Arinta kale ee layaabka leh waxa ay tahay in Digtoorka marka uu u imaado qof bukaana ah ee xanuun ka cabanaya, in aanu markaaba la kulmayn dhakhtarkii, waa in uu jartaa kaadh 5 dollor ah oo lagula kulmayo dhakhtarka.

Tolow ummadda sidaa loola dhaqmayaa maanay ahayn ummad soomaaliya? oo sidayna u ahayn umad soomaaliya?

Ma lacag ayaa laga door biday dadnimadii?

- Dal waxaynu joognaa
- Dhakhtarada dadaaliyo
- Kuwa doogta baantee
- Layidhaa digtooradu
- Dadka kale ha joogee
- Umulaha difaad qaba
- Dawo aaney siineyn
- Haddaan doolar lacageed
- Dhaqso loogu dawdabin

SIYAASADDA

Badi siyaasiinta aduunka ee horumaray waxa soo saaray aqoonyahano.

sida ay u badan yihiin waxa ay bartaan shuruucda dhaqaalaha caalamiga iyo siyaadada, ka hor inta aan la dooran waxa ay bulshadooda ku qanciyaan barmaamij dhamaystiran oo si farshaxanimo iyo foolaadnimo ka muuqato u hagaya aayaha iyo mustaqbalka.

Marka ay ku guulaystaan dhab ayay u abaaraan balan qaad kasta oo ay balan qaaadeen kana mid ahaa barmaamijkoodii siyaadeed, waanay fuliyaan 100% ,laakiin hadaad eegto dhigooda soomaalida balanka ay qaadeen ee ka mid ahaa barmaamijkoodii siyaasadeed lagama yaabo inay sidii looga baahna ay u qabtaan.

Siyaasiinta soomalidu ma yaqaanan hogaaminta (leadership skills) taa macnaheedu ma hantaan quluubta shacbigooda.

Hogaamiye waxa loo yaqaana qofka bulshadiisa qanciya, xitaa haddii uu qaldan yahay.

Sidoo kale siyaasiinta soomaalidu malaha saadalin (predication).

Siyaasiga aqoon yahanka ahna waxa uu leeyahay saadalin arimaha ku soo fool leh si uu uga sii arin sado inta aanay soo wajihin.

Waxa aan kusoo khatimi lahaa maanso kamida maansooyinka uu tiriryey ***abwaan Qorane),*** maansadan oo ka hadlaysa qiimaha iyo qaayaha ay leedahay aqoontu, waxaanay ku bilaabmatay sida tan:-

- Ardayahay cilmigu waa iftiin aadamaa haga'e
- Marna waa awood aad filkaa kaga adkaataaye
- Waa sida aroor iyo shamsiyo. Ogaata waaberiye
- Anabadkiyo wuxuu kaa jiraan inaad asqawdaaye
- Marna waa arsaaq iyo waxaad dib ugu aydaaye
- Omos iyo abaar iyo adoo bacad ku aynfaaday
- Waa guri ugbaadoo gadaal ku ilsamaataaye
- Aduunyada hadday kaa baxdoo ibku socon waayo
- Waa ramad irmaanood markaha abid ku maashaaye
- Markay dunidu wada iilantee sabigu ooyaayo
- Waa ilo dhaqaaloo ma gudho adhaxda jiilaale
- Marna waa asbaabaha nafluhu ka intiqaalaaye
- Waa aalad lagu xoogsadoo lagu adeegtaaye
- Marna waa ilaysoo xagaa lagu ogaadaayo
- Ummi haddii aad tahay talada waad ka anfariirtaaye
- Halka nolosha laga soo unkee laga abaaraayo
- Isagaa indhaha kuu furoo kuu agaasima'e
- Llaalada hawada loo diriyo uumiyaha guuray
- Xiddigaha agtoodiyo dayaxa lama abbaareene
- Waa agabka lagu gaadhayaa meel aan la aqoone
- In muddo ah addunyada qolyahan u ololayaayay
- Ee sida maroodiga arbah adhaxdu weyaatay
- Ee dunidu sida aarka dhaca ka anfariirayso
- Aqoon iyo is maqal bay laxaad adag ku yeesheene
- Jahligu waa alhuumee markii udubka loo saaray

- Afrikada madawo baa fadhida iilkii geerida'e
- Aanaad qabiil kiyo dilkiyo eelkan bixi waayay
- Isagaa u aabbo ah fakhriga aqalka noo yaale
- Hayeeshee waxay eedday baaan kuu akhriyi qaare
- Istimaarka awlaadda waa abab xumeeyaaye
- Inankii guumaysigu afbaray aamiin nooq waaye
- Adiguba bal eegoo markaad dhab u ilaalayso
- Afka iyo hiddaha waa macaan saad u aragteene
- Ereyada shisheeyahana waan ku istareexaaye
- Afcna maleh aqoon taad filkaa ugu adeegtaaye
- Ogowbeey Anaaniyadda iyo gaal isu ekayntu
- Waa waxa adoon naga dhigiyo awr ladhaan sado'e
- Inta ehelu diinkiyo waxyiga la asaraaraayo
- Ee diinta laga ooman yahay taalla agaheenna
- Ee orobbe laga maamulee loo arriminaayo
- Aafaad shacbigu waa mid abid dhammaanayne
- Hadaadse adigu edeb yeelatood buugga ku eekaato
- Aad macllin kaaga aqbashoo waalidka addeecdo
- Adigoo islaamaad cilmiga ururin doontaaye
- Inamiyo gabdhaba waxaad tihiin uud dhawaan baxaye
- Nin abqaalay beerttiisu wuu ku intifaacaaye
- Ogawo qalinka ummad jaahilii abid ma raystaane
- Ogawo qalinka ummad jaahlii ma arad beelaane

GUUSHA

1. WAA MAXAY GUUSHU?

- Guushu, waa marka uu qofku gaadho hadaf uu lahaa. guushu waa marka uu qofku yool uu in badan ku taamayay uu xaqiijiyo
- Guushu waa marka uu qofku arimo uu inbadan ku riyoonayay uu kaga dhabeeyo.
- Guushu waamarka uu qofku haleelo libinta Allana waa fajiyo.
- Guushu waa himilo iyo hiigsi aad leedahay oo aad gaadho, mana aha mid ku timaadda xaglo laaban, sahal, fikir gaabni, hammi yari iyo samir yaraan toona.

Haddaba guushu waa shay cayiman oo la isla yaqaan, laakiin waxa lugu kala duwan yahay heerka guusha. Qof waxa guul u ah ayaa qof kale u bar bar bilowga guusha.
Haddaba guusha waxa sar gooya hanka, hiigsiga iyo humaagyada mustaqbaleed ee uu qofku meel dhigtay.

Maxa Kuu Sahli Kara Tubta Guusha?

Haddaba waxa jira hilin iyo dariiq loo maro guusha

waxana kamida:

- Dajinta hammi iyo higsi fog .haddii aanad lahayn qorshe iyo hannaan aad ku gaadhi karto hammiga iyo guusha aad rajaynayso, lagama yaabo inaad guulaysato.

- Inuu qofku ogaado waxyaabaha ka hor istaagaya guusha,Iswaydii maxad ubaahan tahay oo kuu sahli kara si aad u gaadho guusha.
- Waa inuu joogteeyaa qofku kuna daddaala hayaanka uu ugu jiro guusha,
  Waayo haddii aanad la iman dadaal badan dhayal guusha ha u filan.
- Waa inaad hubisaa kolba hilinka iyotoobiyaha aad u marayso guusha.

Abwaaan cabdilaahi suldaan (timacade) ayaa waxa uu gabay gabyadiisa kamida kaga hadlayay in aan guusha dhayal lagu helin, waxaannay tuducyaddaasi ahaayeen sidan**:-**

- ✓ Lama helo wadaadow waxaan, cid ku hawshoone
- ✓ Naftaa loo hantaaqa waxaad hiigso leedahaye

Waxa haboon inaad iswaydiiso halka ay wax kuu marayaan, maxase kuu qabsoomay maxase aan kuu qabsoobin, haddii kale ma ogaan kartid inay wax kuu kordheen iyo inkale.

- Waa inaad u samirtaa hadiimooyinka ku gadaamaysanjidka guusha, oo aadu dulqaadataa. Inta aad ku jirto hirgalinta iyo xaqiijinta yoolkaaga waxa aad kala kulmaysaa caqabado farabadan, Caqabadahaasna waxaad ka dhaxlaysaa waayo aragnimo, laakiin yeelo samir iyo dhabar adayg aad kaga adkaan karto dhibaatooyinka kusoo foodsaarya kaana hor istaagaya inaad sii wado hirgalinta hammigaaga.

- Waa inaad niyad samaan iyo talo saarasho rabi la timaada si aad u gaadhohamiga iyo hiigsiga aad leedahay.

Waxa muhima inaad Alle Rabi subxanahuu watacaale talo saarato ooaad ayid sanaato. Waxa kale oo muhima inaad niyadaada aad dajiso markasta

- Waligaa nimco iyo kheyr
- Nafta ugu bushaare

- Waa inaad yeelata aragti fog oo aad ka aaminsatay hilinka loo maroguusha. Waxa haboon inaad aragti iyo fikir ka haysato waxa aad rabo inaad ku guulaysato iyo wadada loo maro.

- Waa inaad yeelataa go`aan waayo waxa uu kamid yahay Go'aanku waxyaabaha kuu sahlaya inaad guul gaadho, sababta oo ah haddii aanad lahayn go'aan ma maamuli kartid rabitaanka naftaadda.

- Fuli fikradahaaga adigoo ka bilaabaya meel macquul ah oo aad hadhow ka soo kasban karto. Samee ficil aad ku hirgalinayso qorshayaashada adiga oo mudnaanta siinaya sida ay u kala haboon yihiin in loo soo kala hor mariyo.

- Diwaan gasho hadafyada kuu qorshaysan ee aad hiigsanayso.Samee jadwal ay ku qoran yihiin hadafyada aad hiigsanayso adiga oo u kala horaysiinaya sida ay u kala mudan yihiin.

- Waa inaad lahaata kalsooni buuxdaWaxa qurux badan inaad naftaada ku kalsoonato, haddii aad

naftaada ku kalsoon tahay waxaad awood uleedahay inaad si fudud u guulaysato.

Kalsoonida naftu waxa ay ku dhaxal siisa waayo aragnimo, hawl karnimo iyo cusboonaysiinta wax qabadyada ay awoodo naftaadu.

Maxaa Qofka Ka Hor Istaagi Kara Geedi Socodka Guusha?

Waxa jira dhowr siyaabood oo kaa hor istaagi kara geedi socodka iyo hanaanka aad rabto inaad guul ku gaadho, waxaana kamida kuwan soo socda:-

- **Hammi la'aan**

Waxa dhibaata ah adiga oo doonaya inaad guulaysato haddana yeelan waaya Han iyo hadaf, himilooyinkaas oo leh bar bilow iyo bardhamaad.

- **Qorshe la'aan**

Maadama aad doonayso inaad guul gaadho waxa muhima inaad yeelato qorshe.
Qorshahaaga oo xumaada waa libinta oo aad hanan kari waydo, qorshahaaga oo hagaagana waa adiga uu hantiyay libta guusha.

- **Karti daro**

Maadaama aad leedahay hadaf iyo han doonaysana inaad xaqiijo himiladaada waxa laga marmaana inaad la timaado karti dheeriya si aad mar ugaadho rajada aad naawilayso.

➢ Kalsooni Daro

Haddii aanad marka horaba aanad naftaada kasooni ku qabin lagama yaabo inaad talaabo hore uqaado. Qoddabaada aan kor ku soo xusnay waa kuwa ugu laxaadka weyn ee kaa hor istaagi Kara ama caqabad kugu noqon kara ee kuu diidi kara inaadnoloshaada horumar gaadhsiiso.

Haddaba waxa jira dad inta badan guul daraysta taasi oo ay ugu wacantay hilinkaay u marayaan guusha.
Doonista iyo rabitaanku waa heerka ugu saraysa ee aad ku hanan karto guul, haddii aanad u hiloobayn, haddii aanad u hamuun qabin, haddii aanay qalbigaaga gubayn, haddii aanay hal mar oo qudha niyadaadu xasilooni dareermayn, taasi oo ay ugu wacan tahay rabitaanka ah inaad libinta gaadho**,** ogow doonistaadu ma aha heerkii ugu saraysay ee loo baahnaa.
Waxaana haboon inaad hilin kale u marto xaqiijinta yoolkaaga.

Sida ina farayaan tixahan soo socotaa:-

Haddii aad himiladaadii
Hanan wayday dhowr jeer
Habadalin hankaage
Badal hilinka loo maro.

Waa hawraar wax ku oola kuna dhiiri galinaysa.
Hadda hamiyada uu aadamuhu ku fikirko waxa ugu mug weyn inuu guulaysto if iyo aakhiraba.
Waligaa ma aragtay cid leh waxaan rabaa inaan guul daraysto? mase ma la kulataya cid leh waxa aan rabaa

wadada guul darada, si ay u guul daraystaan ? Jawaabta su'aalahasi waa maya.

Taasi iskaba dhaafe, dadka qaar waxa ay in badan baadi goobaan wadada ay mareen kuwa guul daraystay si ay iskaga ogadaan oo ay ugu baydhaan jidka ay qaaddeen kuwaasi.waxaynu odhan karnnaa taasi waxa ay ka dhalatay baqasho ay ka baqayaan inay guul daraystaan.

Dadka badannkoodu waa ay la kulmaan guul daro, iyaga oo u kala baxa laba:
Kuwo marka ay guulaysan waayaan is dhiiba, nolashana ka dhaca, han iyo hiigsi danbana aan yeelan madama ay ku guul darysteen darajadii koobad ee hirgalinta hamigooda iyo qaar marka ay guul daraystaan wax ka barta oo ogaada khaladdaadka ay sameeyaan si ay usaxaan. waxaannay dardar galiyaan dadaalkooda ku jihaysan inay mar uun guulaysytaan.
Kuwaasina waa kuwa hanntiya libinta guusha mar ay ahaataba.

Guushu waxa ay u baahan tahay samir, dadaal, dulqaad iyo karti dheeeriya.
Haddaba waxa kasta oo fiican waxa ku hareeraysan dhib iyo rafaad. tusaale ahaan haddii aynu eegno janada waxa ku hareeraysan waxa kasta oo naftu necbaysato, halka cadaabtana ay ku hareeraysan yihiin wax kasta oo naftu jeclaysato. Sidaa si lamida haddaba guushana waxa ku hareeraysan dhib iyo cawaaqib fara badan, taasi oo ah waxa looga baahan yahay qofku marka uu rabo inuu hamigiisa xaqiijiyo in uu la imaado dhabar-adayg si uu ugaadho hadafkiisa.

Inta baddan waxa uu qofku la kulmayaa mushkildo farabadan mushkiladahaasna waxa loo bahan yahay inaad si daganaan iyo samir ku jiro aad kaga gudubto.
Markastana ku daddaal xidhiidhka aad Alle (SWT) la leedahay. waayo markasta oo aad ilaahay xidhiidhkiisa wanaajiso adna waxa kuu fududaanaya rajo kasta oo aad naawliyso, balse haddii aanad Alle (SWT) la lahayn xidhiidh lagama yaabo inaad guul gaadho. Haddaba waxa muhima inaad markasta ku da'daasho xidhiidhka aad la leedahay Alle (SWT) aakhiro iyo aaduunyaba si aad u liibaanto, waxa kasta oo aad rajaynaysana waad ku guulaysan doontaa insha Allah.

Isbadal Ma Ubaahan Tahay Si Aad Guul Ugaadho?

War celinta waydiintaasi waa ahaa .sababta oo maadaama ay qoraxkasta oo soo baxda ama dhacdaaba ay igu samaynayso isbadal, isabdalkaas oo ah, mid duleed iyo mid gudeed.
Haddaba si aan isbadal u sameeyo maxa ii sahli kara isbadalkaas ?

Waxa ii sahli kara inaan sameeyo sadexdan qodob ee soo socda:-

- **Aamiinsanaan nafeed (Kalsooni)**

Haddii aanad naftaada ka aamin sanayn inay guul kasa soo hoyn karto xaqiijinta hadafkaaga ogow ma aamin sanid awooda ay leedahay naftaadu si ay isbadal usamayso.
Waa inaad naftaada ku qanicisaa inay u qalanto isbadalka ay rabto.

- **Doorasho**

Doorashada ah inaad doorato nolashaada si ay noqon doonto waa laba mid:-
waa mid togan ama waa mid taban .
Waxa qurux badan inaad habayso oo aad qorshayso nolashaadu nooca ay u eekaan doonto markaad samayso isbadalka.

Sida aynu kawada war qabo waxa aynu kawada war haynaa ninka guri dhisaha ah (engineer) ka ahi inuu qorsheeyo(desing)gareeyo ka hor inta aanu guriga dhisin sida uu u eekaanayo muuqaal ahaan iyo dhismo ahaanba, og yahayna kharashka ku baxaya bar bilow ilaa bar dhamaad gurigaas.

Haddaba waxa lagaaga baahan yahay inaad qorshayso ka hor intaanad isbadalka samayn sida ay nolashaaadu ahaan doonto isbadalka kadib.

- **Doonis**

Doonistu waxa ay timaada marka ay niyaadaada ka dhex guuxayso inaad isbadal ku samayso hab-dhaqanka nolashaada, laakiin hadaanay qalbigaaga ka soo go' in inaad isbadal samayso ogow wali uma hamuun qabtid inaad isbadal ku samayso nolashaada.
Waa inaad u hamuun qabtaa, waa in aad u hilowdaa, waa inaad qalbigaaga holoc ka dhex daarta sidaad mar uun isbadal u samayn lahayd, Isbadalkaasi waa inuu lahaada bar bilow iyo bar dhamaad.

Riyadu waxay taageerta rajada, rajadu waxay dhiiri galisaa dadaalka, dadaalkuna waa natiijada guusha, sidaa darteed riyadu waa xididka guusha.

(Guushu waa garabkaaga, fulintuna waa da'daalkaga, da'daalkuna waa awoodaada, awooduna waa karitaddakugu kaydsan, isku day inaad ibo-furto awoodaha eebbe kugu manaystay si aad guul ugaadho)

TALO

- U dhaqan markasta sida qof wax ka maqan yihiin, oo baadi goob ugu jira sidii uu waxaa u heli lahaa.
- Yeelo saxiib waayo aragnimo badan leh kuguna dhiiri galin kara marka ay caqabado kula soo Darsaan.
- Markasta niyadaada daji oo ku bushaarayso naawilaad kheyr qabta iyo inaad mar uun libinta gaadhi doonto.
- Marna ha ilaawin cibaada Alle iyo talo saarashada rabi.
- Markasta yeelo han sare.
- Hawl aad qaban karto dib ha u dhigan, sababta oo ah kaliyaata waxaad leedahay uun hadba wakhtiga aad haysto, waayo kii hore waa uu ku dhaafay, ka soo socdana ma hubtid inaad gaadhi iyo inkale.
- Guushaadu ha la haato bar bilow iyo bar dhamaad, waayo cadceeduba waxa ay leedahay jiho ay ka soo baxdo iyo jiho ay ka dhacdo, sidaa si lamida ayaammaha usbuucu waxa ay leeyihiin maalin ay ka bilaabmaan iyo maalin ay Ku soo sar-go'aan.
- Wakhti badan u hur guusha aad rabto, sabsabta oo ah inta badan ee aad bixisaa waa inta badan ee dib kuugu soo noqon doonto.
- Ku da'daal raalin galinta waalidka,
- Yeelo samir, qaad, karti iyo hididiillo.

Guurka

Waa Maxay Guurku?

Ileyn guurkuba waa degmo lagu damaashaado, farxad iyo naruurana kuu horseeda, haddii aad hesho qof kula fahma qiimaha nolasha.

Waan iska jecelahay guurka, haddana wali niyada maan galin qofkaan nolasha la wadaagi lahaa, laakiinse mar allaa iyo markaa aan aa arko aroos, maqlana hoonka baabuurta lagu galbinayo arooska ayuun buu qalbigu I dubaaxaiyaa, walee waayaab!!!!!!!!!!!!

Nimcadda iyo naruuradda uu guurka leeyahay qofkii guursadaa garane, waa gabood lagu mahadiyo(Alle SW) waa raas qabow oo raxmad iyo naxariis kudul hoganayso.

Guurku waa heshiish sharci diineed ku fula, guurku waa dhaqan wanaagsan oo aynu kasoo gaadhnay caadana u ahaa nabiyadii iyo anbiyadii Alle soo diray.

Guurku waa sunihii wanaagsanaa ee anbiyada.

Guurku waxa uu leeyahay faa'iidooyin badan, faa'idada ugu muhiimsani waa si xasilooni iyo daganaansho nafeed loo helo.

Waxa kale oo kamida faa'iidooyinka ugu muhiimsan ee guurku leeyahay sidii loo heli lahaa ubad baariya, si aanay tafiirta bini aadamku u dabar go'in.

Sidee Ayay Tahay in Ay Laamanahu Isku Doortaan?

Waxa muhima marka ay labada qof ee lamaanahaah ee doonaya in ay nolol abuuraan in ay isku doortaan qododoban soo socda, si uu guurkoodu u noqdo mid midho dhala.

- Diin
- Dadnimo
- Aqoon
- Waayo-aragnimo
- Kal-gacal
- Akhlaaq
- Daacadnimo

Qodobadaa aan soo sheegay waa kuwa ugu haboon in ay isku doortaan lamaanaha raba in ay unkaan nolol wadata samo iyo sareedo.

GUURKA WANAAGSANI WAA KEE?

Guurka wanaagsani waa ka ku bilowda doorasho wanaagsan oo ku suntan sunuhii rasuulka (csw)
Guurka wanaagsani waa ka laga dhaxlo dhawrsanaan.
Guurka wanaagsani waa ka abuura naxriis iyo jaceyl.
Guurka wanaagsani waaka deganaan iyo xasilooni ay Ka dhaxlaan lamaanuhu.
Guurka wanaagsani waa qanaaco
Guurka wanaagsani waa wa soo saara ubad bariya.
Guurka wanaagsani waa dhawrsanaan

Guurka wanaagsani waa ka leh tanaasul ay isku tanaasulaan lamaanuhu, si uu guurkoodu u noqdo mid waara.
Guurku waa sune ka mida suniihii Rususha iyo anbiyadii uu Alle usoo diray umudiisa.

Aan yara milicsano wixii ay ka yidhaahdeen guurka kitaabka iyo sunada RASUULKA (csw):-

guurku waa caqdi isku banaynaya laba qof oo ajaaniba.

diinteeena suubani waa ay inagu dhiiri galisaa guurka,si looga hortagao xumaanta ay leedahay sinada.

ALLE waxa uu yidhi (rsw)

(Aayadaha ilaahay waxa ka mid ah in uu idiin abuuray lammaane ka ahaadey lafihiina si aad ugu degtaan waxa aan dhexdiina dhignay kal-gacal iyo naxariis waxaana ugu sugan ayaado qoladii fikiraysa)

Nabigunu (CSW) waxa uu xadiis ku yidhi ***(afar waxa ay kamid yihiiin sunadayda xishoodka,cadarka,guurka,iyo cadayga.)***

Xadiis kalena waxuu ku yidhi***(ururkii dhalinyaradoow kiina awooda in uu guursado ha guursado, kiina aan awoodina ha soomo.)***

Guurku waa gaashaan lagaga gaashamanayo macaasida iyo xumaanta.

Haddii aan intaa kusoo dhaafo tacriifinta guurka bal aan wax ka nidhaahno guurka iyo soomalida.

Umada soomalidu waxa ay leedahaya dhaqan iyo caado u gaara dhinac walba oo nolasha kamida.

Guurku waxa uu ka mid yahay arimaha ugu muggu iyo miisaanka culus umada soomaalida meelkasta ha ku noolatee.

Nolasha quruxdeedu waa guur iyo gabadh wanaagsan oo Alle kula kulmiyo.

Bal aan soo qaadano maansadii uu tiriyey **Abwaan Maxamed Ibraahim Warsame (Hadraawi**) ee hablaha geeska

- Haddaan guudka laga jarin
- Guduhiisa xaabkiyo
- Cayayaanka laga gurin
- Marwo dumar garka u xidhan
- Ileyn guri qurux ma leh
- Gaadaha habeenkii
- Kelidaa galgalishiyo
- Ged-geddoonka dhalisoo
- Adigiyo go'aagaa
- Hadba dhinac u guuroo
- Barkintaad gobbaadiyo
- Gashaan ka dhigtaa
- Haddaan guud haldhaaleey

- Kolba gacan la saareyn
- Ileyn gogoshu wehel maleh
- Kuma galo adduunyada
- Ninna goonni-socodkoo
- Marwo garasho dheerbaa
- Ninka raga u gudinoo
- Iyadaa gudoonkiyo
- Gaadh-hayaa naftaadiyo
- Gadiidka reerkiyo
- Gurgurshaaga noqotoo
- Arrin kula gorfaysee
- Haddaan gaari kula jirin
- Illayn nolashu guul ma leh

GUURKII IYO SOOMALIDII HORE

Guurku waxa uu soomaalidii hore kaga jiray maktabad aad saraysa dhanka nolasha.

Noocyada guurka oo kala ah sidatan :-

- Geed-fadhiisi
- Masaafo
- Godob-reeb
- Xigsiisan
- Dumaal
- Dhabar-garaac
- Heeri

NOLASHA LAMAANAHA FIICAN

Lamanaaha ku midoobay in ay nolol unkaan siay nolashaasi ugu noqoto mid samo iyo sareedo wadata, waa in ay mar walba iska war hayaan, islana socod siiyaan xaalad kasta oo mid kamida soo food-saarta.

Ninku inta badan waxa uu ku maqan yahay shaqo, halka ay gabadhuna ku mashquulsan tahay hawlaha guriga.

Haddaba si ay lamaanaha nolashoodu u noqoto nolol farxad iyo naruuro leh waa in marka uu ninku soo guto waajibaadka shaqada dibada wakhti fiican laqaata marwadiisa la talan taalinaysa nolasha una sheekeeya isaga oo muujinaya waji farxad ku dheehan tahay si ay farxad ula dareento dhigiisu.

Sheekada ay lamaanuhu wada sheekaystaan waxa ay xoojinaysaa kal-gacal iyo farxad.

Ninku mar kasta oo uu guriga imaado waa in uu u keena marwadiisa hadiyo yar-yarsida ubax, cadar, fargal, saacad, macmacaan iwm, taasi oo sababi karta in ay jaceyl saa'ida kuu qaado marwadu.

Xaajigu waa in uu la tashado marwadiisa una sheego marka ay xaalado la soo darsaan, taasi waxa ay sababaysaa kalsooni xad-dhaafa oo ay kuu qaado sawjadaadu.

Sawjku waxa muhima in uu marwadiisa kulo hadalo dabacsan oo naxariisi ku jirto.

Gabadhu waa in marka uu sayigeedu ka sii baxayo guriga u labistaa una xushaa dharka uu xidhanayo.

Marwadu waa in marka uu sayigeedu kasii baxayo guriga, ee uu u anba baxayo shaqadda, kusii tidhaah daa hadalo macaan sida:-

macaan waan kuu xiisi doona intaad shaqada igaga maqan tahay.

Gacaliye Allaha garab kaaga ha galo.

Qaali ha iga soo daahin, waan kusii suga doonaa insha Allah.

Allaha wax dhib kulama kulmiyo sawjkaygii. arimahaasi waxa ay ninka ku abuurayaan kal-gacal farabadan oo uu qaado sawjadiisa, inta uu shaqada joogana waxa uu ka fikiyaa xaaskiisa iyo sidii uu guriga dhakhso ugu noqon lahaa, maxaa yeelay waxa uu guriga uga batray hadalo macaan iyo soo dhaweyn joogto ah.

Mararka qaar waa in ay lamaanuhu isku raacaan suuqa marka ay wax soo iibsanyaan isku dooraan dookha midba midka kale.

Gabadhu waa ay ninkeeda dhiiri galisaa si uu dhiiranaan u helo.

Marwadu waa halka uu gurigu ka dhismo ama uu ka dumo, sababtoo ah waa laf-dhabarta uu gurigu ku ku taagan yahay.

Gabadhu waa in aanay ku xujayn sayigeeda wax aanu awoodin.

Sawjadu waa in ay mar walba ku da'daashaa sidii ay sayigeeda nasiimo iyo daganaan u dareen siin lahayd marka uu ka imaado goobta shaqada.

Haddii uu lamaanahaagu kuu keeno hadiyad; hadiyadaas oo aan adiga ku qancin, ku farax sanow waayo waxa uu kuugu keenay si uu farxad kuu dareensiiyo, haddii uu ku waydiiyo/ku waydiiso ma ku qancisay ? dheh haa adiga oo mooraalkiisa ilaalinaya.

Gabadhu waa waa in ay mar walba isku qurxisaa sayigeeda, si uu ugu indho-doogsado.

Intaas haddii aan ku soo dhaafno nolashas lamaanaha fiican.

MAXA U SABSABA BURBURKA QOYSASKA SOOMALIDA?

Markaad aad u fiirso qoysaska soomalida waxaad arkaysaa dhibaatooyin farabadan oo ka dhex holcaya. Allaha ha ka damiyee.

Waxaan is waydiiyay tolow maxa u sababa burburka qoysaska?

Waxaan ukuur galay bal in aan wax ka ogaado dhibaatooyinka hadheeyey qoysaska soomilada, waxaad hadh iyo habeen arkaysaa lamaane is fahan waa xaga nolasha ahi ka dhaxeeyo, markaad su'aasho mid kamida maxaa sababayna, midba midka kale ayuu qaladka saaraya oo uu ku odhanaya isagaa/iyadaa ayaa wada dhibaatada.

Markii aan u kuurgalay indho-indheyn badana ku sameeyay arintaas waxa aan is waydiiyay maxa sababay tolow burburka qoysaskaa, se xal waara ma loo heli karaa?

Sababaha keenay burkaa ayaa wax aan ka qoray qodobada ugu saameynta badan ee iiga soo baxday u kuurgalkii aan u kuur galay arintaas, qodobadaasna waxa kamida:-

- Ka fiirsasho la'aan
- Habka iyo hanaanka ay isku xulanyaan lamaanuhu oo ah hab aan fiicneyn.
- Lamaanaha qoysaska oo ah dhalin-yaro aan masuuliyada qoyska qaadi kareyn, da'ahaana yar, waxaad arkayaa laba dhalin-yaro ah oo ardey ah oo isla baxsaday kuwaas oo doonaya in ay nolol wadaagaan, iyagoo aan masuuliyadaa qaadi karayn.
- Qiimeyn la'aan, soomaalidii hore wiilku marka uu guurdoon yahay waxa uu sameyn jiray qiimeyn balaadhan isaga oo ukuur galaya sidii uu eheli lahaa gabadh la jaan qaadi karta, nolashana la fahmi karta.

- Raggii oo balwad uun lu mashquulsan taasina ay sabab unoqotay in uu ilaawaba masuuliyadii ka saarneyd qoyska.
- Dumarkii oo aan si waadixa u gudaneyn masuulyada guriga.
- hanti la'aan.
- dumarkii oo aad moodo in aaney qiimeynayba kartida ninka laakiin qiimeynaya jeebka ninka.
- xil-gudasho la'aanta dumarka ee gasiinka iyo gogosha.
- kalsooni daro.
- kali talisnimada lamaanaha.
- Ragga iyo tixgalin la'aanta talooyinka dumarka.
- Masiibada sheeko wadaaga gabadhu la wadaagayso dumarka filkeeda.
- Daryeel la'aanta qiimaha xaaldaha uu marayo jaceylka lamaanaha.
- Shaqo la'aanta.
- Dulqaad la'aanta laaamaha
- Dilmada raga iyo dudmada haweenka.
- Sheeko wadaag la'aanta lamaanaha.
- La noolaanshaha ehelka ninka /gabadha gurigooda oo ay ku wada nool yihiin.
- Tanaasul la'aan.
- Qaylo iyi buuq joogto ah.
- Guurka uu gadhwadeenka ka yahay waalidku ee aanay labada ruux raali iska ahayn.
- Samir la'aan.

Qoddobadaas aan kor kusoo xusnay waa qaar kamida dhibaatooyinka saameynta balaadhan ku haya burburka qoysaska soomaalida.

Heerkee ayay ka taagneyd soomaalidii hore burburka qoyska?

Burburka qoysku waa burburka umada, saameyn balaadhan ayuu ku leeyahay burburka qoysku nolasha.

Allaha naxariistii jano ha siiye **abwaan cabdule raage** oo kamid ahaa abwaanada soomaaliyeed kuwooda ka gabyay guurka xumaada ayaa waxa uu lahaa abwaanka:

- Nin goblamay nin good cunay nimay gooli la abaartay
- Nin libaax ku gawdiidsadoo wadnihii gooyay
- Col nimuu ganbiyay, oo gammaankii iyo geelii Laga qaaday
- Gidigood waxa ka guul daran,ninkii guurkii ka xumaaday.

Waxaan Alle ugu baryaaya dhamaan qoysaska islaamka, gaar ahaan qoysaska umada soomaalida, in uu Alle dhibta dhexdooda taala ka kor qaadano, nolol samo iyo sareedo faxad iyo damaashaad, daganaan iyo xasilooni wadatana dhexdooda dhex dhigo.

Waxaan ku soo gabagabaynayaa mawduucan maanso uu tiriyey **Abwaan Ismaaciil Cabdi Yuusuf (Jiheeye)** guurka iyo qiimihiisa,waxaaney ku bilaab matay sida tan:-

- Lamaanayahow gayaankood
- Iska so dhex goobtee
- Farxad lagu galbinayaa
- Horta guurku waa madal
- Gobonimo milgiyo sharaf
- Lagu kala gudoomoo
- Nafta raaxo galisoo
- Marna waa darmiyo gogol
- Lagu gaadho heer sare
- Waa madi gu iyo deyr
- Aan kaa gudheynood
- Abid soo godleysee
- Gurigiina maamuus
- Gallad nimciyo kheyr
- Garasho iyo aqoon sugan
- Samir iyo dulqaad guud
- Guulle haydin siiyoo
- Gabaniyo hablaba ubad
- Noqda kuwa gardaadsada
- Laba yahaw gun iyo baar
- Aroos loo gangaamee
- Caawa guri galkood tahay
- Horta calafku waa geed
- Gacan sami waraabshoo
- Lagu haabto gumarada
- Marna waa rug iyo guri
- Gacal iyo tol iyo xidid
- Gidi loo hanweyn yahah
- Waa gabbood asturanoo

- Naxariis gun dheeriyo
- Kuu horseeda guulee
- Gurigiina maamuus
- Gallad iyo nimciyo kheyr
- Garashiyo aqoon sugan
- Samir iyo dulqaad guud
- Guulle haydin siiyoo
- Gabaniyo hablaba ubad
- Noqda kuwa gardaadsada

XUMAANTA QABYAALADA

Waa maxay Qabiilku? Maxayse tahay Qabyaaladu?

Aadamaha aduunka ku nooli waxa ay ka soo unkameen aadan iyo xaawa, waxa ayna soo mareen maraaxil kala duwan ilaa maantada aan joogno oo ah qof, qoys, qabiil, qoomiyad, qaran iyo qaarad.

Bulshada aasaaskeedu waa qof iyo qofaf isku tagay oo noqday qoys, una sii gudbay qabiil abtirsiimo wadaagna leh.qabiilooyinka isku sumad ah ama aan ahayn oo deegaan wadaag leh, kuwaas ayaa unka qoomiyad wadaagta dhaqan iyo dhaqaale.

Waa Maxay Faraqa U Dhaxeya Qabiil Iyo Qoomiyad?

Sida ay maanta wax walbaaba iskaga keen khaldameen haddii aynu nahay umada soomaalida ayaa waxa iskaga keen khaldamay qabiil iyo qabyaalad.

Qabiilku waa qoys iyo qofaf kasoo kala jeeda meel magac-wadaagna ah, waana sune kowniya oo uu Alle ugu talo galay.

Maadama qabiilku yahay sumad koox dad ahi wadaagaan, muhiimadiisuna tahay in la isku aqoonsado, la isku xidhiidhiyo, la isku wanaajiyo, wanaagana la iska kaashado, xumaantana looga hortago sida uu Alle qur'aankiisa inoogu sheegay.

Qabyaaladu waa ku dhaqanka afcaasha iyo fikiradaha taban ee kasoo maaxday caqliyada caadifaysan.

Qabyaaladu waxa ay timaada marka qabiil loo adeegsado wax kasta oo ku lid ah ayaada uu Alle inoogu sheegay qur'aankiisa,iyo waxa kasta oo ka soo horjeeda sifooyinka wanaagsan loona isticmaalo dhanka togan.

Qabiilku waa sida uu Alle inoogu cadeeyay sida aynu kor kusoo xusnay oo ah in la isku aqoonsado.

Haddii aan si kale u idhaahdo qabyaaladu waa marka magacyada qabiilada loo isticmaalo kala saraynta bulshada, sida in aad aamin santahay In reerka aad ka soo jeeda uu kasareeyo qabiilada kale.

Qabyaaladu waa marka aad laba qof ku kala jeclaato qabiilka ay kasoo jeedaan.

Qabyaalada waa qofka o qaba figrad ah in awooda dalka, talada iyo waliba dhaqdhaqaaqa dhaqaale ee wadanku leeyahay ay qabiilkoodu gacanta ku hayo sida maanta haysta umada soomaalida.

Waa Maxay Dhiibatada Ay Inoo Gaysatay Qabyaaldu Wakhtiigii Tagay?

Taariikhda soomaalida inta la garanayo waxa ay u noolayeen hab qolo qolo ah iyo qabiilooyinku reer miyi ah oo aan waligood yeelanin dawlad iyo maamulo ka dhaxeeya, qabiilooyinka iyaga oo walaal ah ayay hadana midba midka kale col la ahaa waanay dagaalami jireen,

dagalaadaas oo ay sabab u ahaayeen geel ay kala dhici jireen iyo soohdimaha dhulka.

Arinta Qabiilooyinka ukala dagdagan jees-jeeska iyo nolasha kalinimada ah waxa ay sababtay quwad iyo awood la'aanta umada soomaalida. Taas oo sababtay in cadaw shisheeye dhulkoodii soo hungureeyo isaga oo ogaaday in umada wadanka lahiba ay tahay qabiilo yar-yar oo gooni gooni u kala yaala xidhiidh walaaltinimana ka dhaxeyn ee ay iyaga dhaxdoodu cadaw isku yihiin.

Kadib dawladii shisheeye ee reer yurub ayaa dhulkii soomalida kala boobay oo dawladba qayb goosatay.

Qabiiladii soomalidu waxa ay noqdeen qaar uu gooni ula heshiiyo, kaas oo qaar soo dhaweystay, qaarna diley, qaarn hub iskugu dhiibey oo iyaga isku diray.

Dawladihii reer yurub ee ingiriiska, faransiiska iyo talyaaniga ayaa qayb saday dhulkii ummada soomaalida, heer waxa ay gaadheen xoolahoodi laga qaado oo cunto looga dhigo ciidamadooda wadama kale jooga.

Talyaanigu inta uu gumeysanayay soomaaliya waxa uu soo ururin jiray dadka si uu ugu qado beeraha, saraca kasoo baxana waxa uu dhoofin jirey wadankiisa, sidoo kale waxa uu talyaanigu sameystay warshado badan oo uu wadankiisa dhaqaale ugu soo saari jirey,dadka soomalida ahna waxa uu ku qasbi jirey in ay bilaash ugu

shaqeeyaan, xoolahoodana waa uu munaafacaadsan jirey.

Ingiriska mudadii uu gumeysanayay soomaaliland waxa uu si arxan daro ah ula dhaqmi jirey bulshadii ku dhaqneyd gayigaas, kaas oo xoolahooda udhoofisan jirey ciidamadiisii joogay cadan, qaar kamid ahaana ka dhigey askar u dagalama isaga oo uu siiyo in yar oo nolol maalmeedkooda ah, kheyraadka dalkana sida uu doona ugu tagrifari jirey, sida kheyraadka xeebta dhararsan ee ay lahayd soomaaliland.

Faransiisku mudadii uu gumeysanyey jabuuti waxa uu ku khasbi jirey in ay qaatan dhaqankiisa kuna dhaqmaan, isagoo kheyraadka dalkana sida uu doonu u maamulan jirey.

Aakhirkii dawladihii reer yurub markii ay dhulkii ka dhargeen kheyraadkiisii, dantay ka lahaayeene ka fushadeen, waxa ay gacanta ka galiyeen dhulkii oo ay u qaybiyeen wadamadda ina jaarka ah ee (Kenya iyo Ethiopia) oo ilaa maanta dhulkeenii bilaash ku haysta.

Wakhtigii xornimada ay qaateen soomaali British iyo soomali italy waa ay heshiiyeen.

1960 waxa dhidibada loo tagaay dawladii u horaysay ee soomaali yeelatay magaceeduna yahay jamuuriyada soomaaliya.

Laga soo bilaabo **1960** waxa ay ummada soomalidu yeelatay dawlado kala duwan oo qaarkood quwad lahaayeen, lakiin nasiib daro dawladahaasi may noqon dawlado sii waara, waxaana u horseeday in ay burburaan laba qodob oo kala ah :-

- **Qabyaalad**
- **Maamul xumo**

Dhammaan daafaha aduunka waxa laga helayaa umad soomali ah oo la gumeysanayo laguna kacayo tacadiyo ka dhan ah nolasha aadamaha.waxaana u sabsab ah in ay kala firdhaan dagaalo saameeyay wadamadoodii,kuwaas oo ay sabab u tahay maamul xumo iyo qabyaalad, Allaase gargaar leh.
Laga soo bilaabo milaygii ay xoriyada qaadatay soomaalidu ilaa maanta waxa hadheeyey aafooyin dagaal iyo musuqmaasuq.

Diintu Maxay Ka Qabtaa Qabyaalada?

Diinteenu waxa ay inoo sheegtay xumaha ay leeyadahay qabyaaladu.

Manhajka diinta islaamka oo ah kitaabka uu Alle soo soo dajiyey si loogu dhaqmo waxa uu qabyaalada ku yidhi ayaadan :-


يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّاسُ إِنَّا خَلَقۡنَٰكُم مِّن
ذَكَرٖ وَأُنثَىٰ وَجَعَلۡنَٰكُمۡ شُعُوبٗا
وَقَبَآئِلَ لِتَعَارَفُوٓاْۚ إِنَّ أَكۡرَمَكُمۡ
عِندَ ٱللَّهِ أَتۡقَىٰكُمۡۚ إِنَّ ٱللَّهَ عَلِيمٌ
خَبِيرٞ ١٣

Aayadan oo micnaheedu yahay (***dadoow waxa aan idinka abuuray mid lab iyo mid dhedig,waxaanan idinka dhigney shucuub iyo qabaa'il si aad isugu garataan.)***

Nabigeenu CSW aadbuu ugu hadlay qabyaalada, aadna waa uu u dhaliilay. waxaana kamid ahaa hadaladii nabiga CSW :- ***(naga mid ma ahan qofkii uyeedha casabiyada,qabyaalada) (naga mid ma aha qofkii u dagaalama casabiyada; naga mid ma aha qofkii ku dhinta dagaalka casabiyada qabyalada)***

waxa wariyey abuu daa,uud

HEERKEE AYAY MARAYSAA KU DHAQANKA QABYAALADU GAYIGA AY DEGTO SOOMALIDU ?

Heerka ay marayso ku dhaqanka qabyaladu waa oday ka sheeke.

Nin abwaana ayaanini waydiiyay su'aal ahayd goorma ayay qabyaaladii xumaatay, ninkii abwaanka ahaa waxa

uu ku jawaabey qabyaaladu markii ay geedka duqaydu ku taliso lagu hayay may xumayne, waxa ay xumaatay markii maqaaxiyaha lala imid.

Ana waxa aan leeyahay qabyaaladu waxa ay goosatay xadhkaha markii uu reer walbaaba yeeshay siyaasi iyo xisbi, taas oo dib u soo cusbaynaysiisay nidaamkii qabyaaladda.

Dhamaan gayiga ay degto umada soomalidu waxa fara ba'an ku haya nidaamka qabyaalada oo heerkii ugu xumaa maraya.

Maalin maalmaha kamida ah ayaa waxa dhacdey anigoo ku jira meel meherad ah oo tukaana ayaa waxa noo soo galay nin, ninkaasi waxa uu iibsaneyey biyaha mooya saxada la yidhaahdo, ninkii iib sadaha ahaa iyo mulkiilihii meherada ayaa waxa ay is way daar sadeen hadalan :-

Iibsade: waxa aad iga iibisaa midh biyaha mooyada saxada ah.

Mulkiile : waayahay ee hoo.

Iibsade : oo waaxay adeer nooca aad naga iibinaysaa?

Mulkiile : oo kuweed rabtey aduu?

Iibsade: dee adeer ma biyihii reerkiinu soo saareen ayaad suuqgeyn ku sameynaysaa, naga iibi anagaba

biyaha ay soo saareen reerkayagu, maba cabo biyo aan aheyn biyahayagase.

Mulkiile: adeer garanba maayo cid soo saarte hoo biyaha, meel xunbay qabyaaladu kaa gaadhe.

Iibsade: adeer biyahayaga ayaan suuq geynayaaye, ha igu socod siin biyaha reerkiina
……..

Amakaag !!!!!! aad ayaan ula yaabey hadalada ay is waydaarsanyaan labada qof.

Heerka ay qabyaaladu inaga mamaryso waa heer aan odhan karo waa heerkii ugu hoosaysay.

Waxa ayaan daro wax lagu tilmaamo ah in haddii aynu soomaali nahay inagoo markii horaba tiradeeenu yarayd hadan isa sii kala qaybina, taasina waata sababtay in lagu soo wada xisaabtabo awood la'aanta soomaalida, lana gumeysto meelkasta oo ay aduunka dacaladiisa ka joogaan.

Talooyin ku saabsaan sida loo daweyn karo qabyaalada

Haddii la maro wadiiqooyinkan sida aan isleeyahay waa la dabar jari karaa qabyaalada.

Waxaana kamida qodabadas:-

- Olole wacyi galineed oo dadka laga wacyigalinayo xumaanta qabyaalada.
- In bulashadu iska Ilaaliso quudhsiga qof ama qabiil.
- In lagu dhaqmo diinta, waayo diintu si fiican ayay inoogu sheegtay xumaha ay leedahay qabyaaladu.
- Xisbiyada siyaada oo joojiya reer reer la shirida.
- Qof haddii loo codeynayo in loogu codeeyo ilaahey dartii, iyada oo la eegayo tayada iyo kartida uu leeyahay, laakinse aanla eegeyn qabiilka uu ka soo jeedo.
- In maamulka dadka xukumaa ka qaato go'aan ka dhan ah qofkii lagu maqlo casabiyada (qabyalada)
- In laga wada shaqeeyo mideynsiinta umada soomaalida.
- In bulashada la baro wax wada lahaanshaha iyo iskaashiga.
- Maamulka umada xukuma oo noqdo kuwo u cadaalad sameeye bulashadooda.
- Maamulka oo noqdo kuwo ka madhan qabyaalada.

Maxey ka yidhaahdeen abwaanada soomalidu qabyaalada:-

- Ubuxiinii waad daadiseen, waa na dubateen
- Dul baxdiisii waad wada canteen, duhur dharaareede
- Dariiq toosan soomalidaay, waa lagaa da'deye
- Darajada ilaahey ninkii, doonayaa hela'o
- Nin ka duday disoorka iyo waxyiga, diintii ka carrowye
- Dugsi ma leh qabyaladi, waxay dumiso mooyaane
- Haddaynaan xumaantiyo dilkiyo, daynin kala qaadka
- Dibaddaan ka joognaa sharciga, daacadda ilaahe
- Danbarkeedu waa jahannabiyo, dogobkii naareede
- Dul iyo hoos ba waan ugu dhigee, waaa dix Dhagaxeede
- Anuun baa damqanaaye dheguu, uma daloolaane
- Dadkaan la hadlayaan baan lahayn, dux iyo iimaane
- Bal inay dalfoof tahay caqliga, dooni laga saaray
- Wixii hore u soo daashadeey,dagashaneysaaye

Waxa titiyey Gabaygan**Abwaan c/laahi suldaan (tima-cade)**

Xaalka Soomaalida

Xaalka umadda soomaalidu waxa uu marayaa maanta halkii ugu hooseysay, taasi oo ay ugu wacan tahay dagalada , qabyaalada, musuqmaasuq iyo maamul xumada hadheysay.

Waa kastoo baryaaya waayihiisu wateeye.

Milayba jirey soomaalidu ay ahayd dad qiimo iyo qaayaba leh, dhexdoodana uu yaalay wanaag iyo galgacal.

maanta se xaalka umada soomallidu waa bariga dhaxe.

ummadii soomaalidu waxa ay uqaybsantey laba qaybood qaran-joog iyo qurbo-joog

Qaran-joog

qaran-joogu waa qaybta joogta dhulkoodii hooyo.

Qaran-jooga waxa uu usii kala baxay saddex qaybood kala ah :-

- **Dabaqad-sare**: dabaqada sare waa qolada tijaarta iyo madaxda, iyagana dalka ka taliya sida ay doonaana ugu takrifara, dabaqada-sare waa dad ladan oo Alle wax siiyey, laakiin aan u naxariisn umadooda baahan ama liidata, waa dadkii la rabay in ay dadka hogaamiyaan, balse aan sidii loo baahna u hogaamin.

Ganacsatadu ma aha dad u tudhaya umadooda, balse markay doonaan maceeshada sare ayay ku geeyaan, markay doonaana hoos ayay ugu dhigaan.

Waxa ay la soo dagaan alaab, alaabtaas oo aan tayo lahayn, keentana waxyeelo caafimaad iyo khataro kalaba, kama naxaan ummadooda umana tudhaan.

Toolow dadka alaabta aan tayada lahayn loo keenayaa maanay ahayn dadkoodii?

Alaabta ay lasoo dagaan qaar ayaa ka mamnuuca wadama lagu sameeyo, kuwaas oo ay ku qoran tahay lagama isticmaali karo dalka gudihiisa, dibadiisa mooye, markaas ayay iyagunu soo iibsadaan si ay ugu sii iibiyaan bulashooda, tolow maanu damiir damqada lahayn? Tolow umada sidaa loo galayaan miyaaney ahayn umadiisii? Tolow miyaanu ogeyn in uu ka Alle xisaabin doono maalinta aakhiro? Tolow? tolow?.....

Mee maamulkii ninka maatadiisa sidaa u galaya xisaabin lahaa ?mise waa wax la isla ogaa ?

Qoysaska iyo ubadkoodu nolol fiican ayay ku nool yihiin haddii anay dibadahaba daganeyn.

- **Dabaqada-dhaxe** : waa qolo iyaguna ka adag nolol maal meedkooda iyo baahidoodaba.

Waa koox awooda nolol maal meedkooda iyo waxogaa aduun ah haysta. iyaguna hoos uma eegaan walaalooda ka hooseeya

Ubadkooda iyo qoysaskooduna waxa ay kunool yihiin nolol aad ufiican, waxbarashadan waxa ay ka dhigtaan dugsiayda qaaliga

Oo tolow maan la iskuba naxayn? waaba yaab! waaxay umadan mid kastaa gooni iskaga nool yahay midna mid ka war hayn.

Qoysaska iyo ubadkoodu waxa ay ku nool yihiin magaalooyinka. waxbarashada waxa ay ka dhigtaan meelo aad ufiican, gaar ahaan dugsiyada gaarka loo leeyahay oo leh tayo waxbarasho oo aad u fiican.

- **Dabaqada-hoose**:- qoladan waa qolada ugu hoosaysa heerka nolasha, ilahay agtiisa kama hooseeyaane.

Waa kuwa dulman, waa kuwo qaado ma dharagto ah, haddii saaka ay qureecdeen laga yaab in aanay haysan waxa lagu qadeeyo, haddii la qadeeyana waxaaba laga yaaba in aanay caawa casheyn. Alle mooye cid wax ku tartaana ma jirto, waxa ay kunool yihiin meelo ka baxsan magaalooyinka.

Ubadkoodu laga yaabaaba in aanay waxba dhigan duruufo dhaqaale awadood, haddii ay dhigtaana waxa ay dhigtaan dugsiyada dawlada oo aan lahayn aqoon tayo leh.

Qaran-jooga waxa haysata dhibaato fara badan oo ka mid yihiin kuwan soo socda:-

- Maamul xumo
- Cadaalad daro
- Musuqmaasuq
- Qabyaalad
- Sixir barar
- Dhaqaale-xumo
- Caafimaad aan tayo lahayn
- Waxbarasho aan tayo lahayn
- Shaqo la'aan iyo qaar badan oo aanan halkan kusoo koobi karayn.

Qurbo-joog

Qurbo-joogu waa qolada ku nool wadanka dibidiisa, kuwaas oo wadama ay ku nool yihiin u tagay sidii ay uheli lahayeen nolol dhaanta nolasha ka jirta dhulooda.

Dadyowgaa ku nool wadama dibadiisa qaar ayaa haysta sharciga daganaanshaha wadanka ay ku nool yihiin, halka ay qaarna ku joogaan dhuumasho iyo hab qaxoontinimo.

Dadkaas waxa haysta dhibaato fara badan oo ka mid yihiin kuwan soo socda :-

- Gumeysi
- Xor la'aan
- Cunsiriyad ka dhan ah
- Midab-takoor

- Awood umalaha in ay sida ay rabaan u gutaan nolashooda.
- Xor uma aha fikradahooda.
- Qaar kood wadamada ay ku nool yihiin waxa ay kunool yihiin nolol aan fiicneyn.
- Dhaqankii oo ay ka tageen.
- Afkii oo doorsoomey.
- Badhkood oo diinta ka baxay.

Intaas haddii aan kusoo dhaafo dhibaatooyinka haysta nolasha maanta iyo xaalka soomalida.

Ummadii soomalida la odhan jirey meelkasta oo ay kunool yihiin way dhiban yihiin dal iyo dibadba.

Kuwii dalka joogayna dhibaato ayaa haysta ,kuwii dibadana sidaa si le'eeg .

Marka aad u fiir-fiirsatana waxa aad is waydiinaysaa tolow maxa u sabsaba mushkiladahan iyo dhibaatooyinkan saameeyey dhamaan ummadii soomalida?

Sheeko sooamali ah ayaa waxa ay tidhaahdaa oday waayeel ah ayaa waxa uu la sii dardaarmey wiilal uu dhaley oo ahaa sagaal wiil.

Soomaalidu waxa u caada ah marka uu odayga reerku da' gaadho ee uu is idhaa waxay gaadhey xiligii aad nolasha ka faaruqi lahayd, waxa uu dardaarn sii siiya ubadka uu dhalay, sidaas si lamida odaygani waxa uu

dardaaran taaba gala sii siiyey wiilashiisii, waxaanu ku yidhi sida tan :-

Wiilasheydiiyow waxa la gaadhey xiligii aan nolasha ka faaruqi lahaa, waxaan idin sii siinayaa talo, taladaas oo ah talo wax ku ool ah, haddii aad qaadataan oo aad ku camal fashaana waxa aad noalshiina ku noolan doontaan nolol fiican, haddii aad ka tagtaan talaydaadana waakhasaari doontaan. odaygii waxa uu isagu wada yeedhay dhamaan inamdiisii waxaan u diray mid walba hal ul ah. dhamaan inamadii waxa ay soo wada qaateen ulihii.

Waxa uu ku yidhi mid walbow isku day in aad jabiso ushaa aad soo qaaday, wiilashii mid walbaaba waxa uu jabiyey ushii.

Odaygii waxa uu hadana u direy ulo kale waxaanu ku yidhi mid walboow soo qaad ul, dhamaan inamdii waxa ay soo wada qateen hadana ulihii.

Odaygii waxa uu hadan wiilashii ku yidhi isku wada xidha dhamaan ulaha, wiilashii waxa ay isku wada xidheen ulihii.

Odaygii waxa uu ku yidhi wiilashii isku day in aad mid kastow hal mar inaad jabin karto ulahaa la isku xidhay.

Dhamaan inamdii waxa uu mid walbaaba isku day I nuu jabiyo ulahaas, lakiin nasiib daro, way ku guul dareysteen in jabiyaan wiilashii ulihii.

Odaygii inta uu inamdii isugu wad ayeedhay ayay agtiisa wada imaadeen, kadib waxa uu ku yidhi sida tan:- wiilashaydiiyoow haddii aad kala tagtaan oo midkastaa gooni socod noqdo sidaa ushaa kaliya aad u jabiseen ayaa mid kasta loo dili karaa, haddii aad isku duubnaataan oo aad mid ahaataana cid idinku soo dhaci kartaa ma jirto, waxaanad noqonaysaan kuwo awood leh.

Waxaan maanta leeyahay ummada soomalida waxa ugu wacan dhibatadaas kala tafaraaruqa ay kala tafaraaruqeen iygoo markii horaba tiradoodu yarayd marka loo eego dayowga kale ee aduunka.

Waxa ragaadiyay xiqdi iyo xumaan, waxa hoos u dhigay qabyaalad iyo qudhin, waxa qayrkood ka reebay rajo la'aan iyo hami yari.
Kooga horumar gaadha uma qiraan umana hambalyeeyaan, iska dhaaf dhiiri galin uu ka helee, mar Allaa iyo markaa ay arkaan in uu shaqsigaasi horumar ku talaabsaday ayuunba mudici lagu wada noqoyaa, halka dadyowga kale ee dunidu kooga wax hindisa ay dhiiri galiyaan uguna hambalyeeyaan horumarku ku talaabsaday.
Ummada soomalida dhibaatooyinka haysta kuma soo koobi karo qoraal, laakiin waxaan ku baraarujin lahaa uun in ay isku duubnaadaan meelkasta oo ay joogaan, waxna is taraan.
Cudurka xun ee ragaadiyay dhamaatood, cudurka xun ee cadaawada ka dhex abuuray, Allaha ha shaafiyo.

Wakhtiga

Erayga wakhti asal ahaan waa eray carabi ah.luuqadeena hooyana waxa uu wakhti la macno yahay erayga **(amin, milay, goor**)

Wakhtigu waa qayb kamida nolasha qofka bini aadamka ah.

Taasi oo looga baahan yahay inuu uu qofku ka faa'iidayso maalmaha kooban ee aduunka guudkiisa uu ku noolyahay.

Wakhtigu waa rasamaalka uu qofkasta is u leeyahay taasi oo aanay cidkale la lahayn Alle mooyaane, taa macnaheedu wakhtigu waa hanti uu qofkasta oo bini-aadam uu ku galadaystay Alle (RSW) loona baahan yahay in uu Alle ugu mahad naqo.

Wakhtigu waa nimco kamida nimcooyinka ugu qaalisan ee Alle siiyo adoonkiisa, taasi oo looga baahan yahay in uu ugu faa'iidaysto aduun iyo aakhiraba.

Wakhtigu waa ka kala fadila laba qof, kana yeela mid aduun iyo aakhiraba liibaana, ka kalana ka yeela mid aduun iyo aakhiraba guuldaraysta.

Wakhtigu sidee buu qof ugu hiilin karaa?

Haddii aan ka jawaab bixiyo waydiintaas ah sidee buu qofka ugu hiilin karaa wakhtigu, jawaabta su'aashaasi waa sidatan, waxa uu wakhtigu ugu hiilin karaa haddii uu si fiican ugu faa'iidaysto wakhtigiisa.

Aminta(wakhtigu) waxa uu ka bilaabmaa sikino, sikino isku tagayna waxa ka dhasha minityo, minityo isku tagayna waxa ka dhasha saacad, saacado isku tagayna waxa ka dhasha maalmo, maalmo isku tagayna waxa ka dhasha todobaad, todobaadyo isku tagayna waxa ka dhasha bilo, bilo isku tagayna waxa ka dhasha sanad, sanado isku tagayna waxa ka dhasha cimrigaaga.

Haddii aan sii bayaamiyo su'aashii, qofka waxa uu wakhtigu u hiilin karaa marka uu ka dhigto saaxiib,ee aanu dayacin hal minitna Allaha ha ka yeele, si fiicana ugu faaiidaysto.

Haddii aad ku xisaabtanto oo aad ku da'daasho ka faa'iidaysiga wakhtiga iyo dayacaad la'aantiisa,ogsoonow waxkhtigu waxa uu noqon doona mid kuu hiiliya oo garabkaag istaaga.

Maxa ii sahlaya si uu wakhtigu iigu hiiliyo?

Haddii aad rabto in uu wakhtigu kuu hiiliyo garabkaagana ahaado raac talaabooyinkan soo socda :-

- Wakhtigaga ha ku lumin wax aanay dani kuugu jirin.
- Wakhtigaga inta ugu badan la qaado la hadalka naftaada, waayo sababta oo ah lahadka naftaadu waxa ay kuu suurto galinaysaa in aad is ogaato cidaad tahay, waxaad tabayso, waxa kaamaqan iyo waxa kaa khaldan.
- Wakhigaaga sii dadka mufakiirinta ah ee aad wax ka faa'iidayso.
- Wakhtigaaga u yeel jadwal aad ku xisaab tanto oo maalin le ah, toddobaadle ah, bile ah iyo waliba mid sanadle ah.
- Ogsoonow in uu wakhtigu yahay hanti ma guurto ah oo aad leedahay.
- Ogsoonow nolashaada quruxdeedu waa sida aad waxkhtigaaga uga shaqaysiiso uguna faa'iidaysato.
- Aduunka oo aad ku nolaato nolol raaxo leh iyo aakhiro oo aad jano gashaa wax kale kuma xidhna, waa wakhtigaaga oo aad sida uu Alle raalida ka yahay u isticmaasho.

Haddii aan intaa kaga dhaamado qodobadaas bal aan soo qaato tusaale wax ku qaadasho leh, laba arday oo isku da`a isku maskax ah, isku diin ah oo wakhtigu kala fadilay.

Labada wiil waxa la kal yidhaahdaa xuseen iyo xasan.

Xuseen waa wiilka wakhtigu kor uqaadey, halka uu xasan yahay wiilka wakhtigu reebay.

Xuseen waa nin dhalinyaro waa arday dhigta dugsi sare, xaafadoodu ma xuma oo ma liidato dhaqaale ahaan, xuseen waxa uu kacaa 4 habeenimo isaga oo marka uu

sidaa kaco wayso qaata, kadib marka uu waysaysto waxa uu tukadaa laba ragcadood oo suna ah, intaa ka dib marka uu dhamaysto salaada sunaha ah wax uu bilaaba in uu akhriyo kitaab waxogaa 15 minit ah, marka uu kitaabka akhriyo waxa uu si toosa u bilaaba akhrinta casharadii loo soo dhigay ilaa inta ay ka gaadhayso 6 subaxnimo.marka ay gaadho lixda subaxnimo waxa uu udiyaar garoowbaa una anbabaxa dugsigiisa isaga oo niyad ahaan dagan.

maalintaas marka uu soo dhigto iskuulka ee uu ka imaado waxa uu soo maraa masaajid kadib waxa uu ku soo tukadaa salaada duhur, waxa uu si toosa u tagaa xafadooda marka uu cuno wixii Alle ka siiyo waxa uu yara nasiyaa naftiisa ilaa inta la gaadhayso salaada casar, marka uu tukado salad casar waxa uu tagaa meel collage ah si uu aqoon usoo korod sado, waxa uu ka soo baxaa salaada maqrib horteed, marka uu salaada tukado maqrib, waxa uu yara nastaa mudo 30 minit. Kadib waxa uu si toos au bilaaba wax akhris si uu dib ugu muraajiceeyo wixii uu maanta soo dhigtay.

Waxa uu akhriskaa wadaa mudo 2 saacadooda ardaygaasi waa arday ka faa'ideyay wakhtigiisii, Allana xidhiidh fiican la leh.

Xuseenwaa arday da'daalaya wakhtigiisana si fiican u mareeyay, rajo fiicana naawilaya haddii Allaha awooda

lahi u ogaalado, kaasi waa jadwalks maalin laha ah ee uu xuseen ku dhaqmo.

Xasan waa arday dhigta dugsi-sare. waa arday wakhtigiisa inta u badan ku lumiya ciyaar iyo waxaan faa'ido ulahayn aroortii waxa uu kacaa 7 subaxnimo waxa uu tagaa dugsiga isagoo habsana aroor kasta, waxaanu ka imaada 12 duhurnimo, marka uu siddaa ugu imaado iskuulka wixii Alle u qorayna uu cuno waa uu seexda, kadib marka uu ka imaado dugsiga waxa uu kacaa 4 galabnimo.

Marka uu kaco 4 galabnimo waxa uu tagaa garoonada lagu ciyaaro kubada cagtasi uu ciyaaro kubada, waxa uu kasoo baxaa kubadda salaada maqrib, marka uu ka imaado kubada waxa uu si toosa haddana u tagaa oo uu u raaca dhalin yaro ay ku saaxiiben wakhti lumis ilaa inta laga gaadhayo 9 habeenimo waxa uu ku mashquul san yahay wax aan faa'ido ugu jirin.

Haddaba bal akhriste kee baad labaada arday is leedahay wakhtigu waa uu u hiilin karaa?

Haddii aynu adeegsano maskaxdeena xumaha ka saafiga ah, dadnimada wanaagsan iyo damiirka xalan markaaba waxa aad niyada galinaysaa in

ardayga xuseen haddii allaha awooda lihi idmo in uu aduun iyo aakhiraba liibaani doono, nolol samo iyi sareedo wadatana gaadhi doono insha Allah.

Ardayga xasan waa arday aan Alle xidhiidh fiican la lahayn, wakhtigiisa inta ugu badana ku lumiya waxa aan faa'ido lahayn, ardaygaa haddii aynu cabirno saansanka nolashiisa waxa aynu ka qiyaas qaadanayna sida uu imikaba aanu naftiisa horumar ula jeclayn ayaanu mustaqbalka nolashiisa kusoo foolka lahina aanu unoqonayn mid nolashiisa u horseeda nolol samo iyo sareedo.

Talooyin ku saabsan wakhtiga:-

- Samee jadwal maalinle ah, todabaadle ah, bile ah, sanadle ah si aanu wakhtiba kaaga lumin.
- Qiime wakhtigaaga si ay nolashaadu qiimo u yeelato.
- Wakhtigaga kaga faa'iidayso waxa aduun iyo aakhriba ku anfacaya.
- Wakhtigaagainta u badan sii dadka saaxibul caqliga ah iyo dadka aqoonyahanada ah.
- Wax aad maanta awoodo inaad qabato dib ha u dhigan inaad markale qabato.
- Ku fikir oo ku hami oo dareen sanow in cadceed kasta oo soo baxdaa ay kugu samaysanayo isbadal, sida ay isbadal kuugu samaysanayso adna waa in aad nolashaada is badal ugu samayso.
- Wakhtigaagu waa nolashaada, nolashaaduna waa nafsadaada, nafsadaadana lama rabtid in aad guul daraysato, ee wakhtigaga ha ku lumin dhayal.

Bal aan soo qaadano maanso kooban oo ka hadlaysa wakhtiga:

- Wakhtiguna qof aan bilin
- Qof aan baanan waligii
- Basar aa umaamulin
- Qof baashaalka laasimay
- Miridhkiisa baayicin
- Barkhad aan ka dhaansanin
- Aqoon aan ka buuxsanin
- Ku baxnaanin maankiyo
- Inta uu ubaahdee
- Beni-aadam kaashado
- Ma bulleeyo waligii
- Kama dhigo qof buuniya
- Oo warkiisu badihiyo
- Buurahaba dhaafoo
- La hiigsado bidhaabtii
- Cimli-daalib dhaafiyo
- Baadi-doonku daalan
- Barbaareey dantiinuna
- Sidaad uga bakhayshee
- Bixinta u adkeysee
- Wakhtigu ubadbaadaa
- Midho ugu bislaadaan
- Lagu beegsadaa nolol
- Ha bireyn ha baylihin
- Ha biimaynin maalmaha
- Qorshe la ‘I ha baandheyn
- Wakhti kuu bannaanaa

- Aduu aad wax bara layd
- Ama aad dad bari layd
- Ha ku baadhiyaynin

Guntii iyo gunaanadkii akhriste qiimaha wakhtiga kuma soo koobi karno halkan, Intii karaan kayga ah ama awoodaydu ahyad ayaan kusoo bandhigay.

Laakiin sida ay wada ogsoonahay wakhtigu waa shayga ugu qaalisan ee qofku hanti u leeyahyay, sida aan xaga hore ku soo sheegnayba, waxa qofna kor uqaada nolashiisan kana dhiga mid samo iyo sareedo wadata waa habka iyo hanaanka uu wakhtigiisa u maamulo una qorsheeyo.

Haddii aynu nahay ummada soomaalida la yidhaana waxa aynu ka mid nahay dadyowga wakhtigooda kulumiya wax aan faa'iido ugu jirin. Halka dadyowga aduunka ee horumaray ay ka faa'iidaysteen wakhtigoodii.

waxa aad arkaysa dhalin yaro fara badan oo da'doodu u dhaxaysi 20 – 40 jiro oo wakhti dhan 4 saacadood laga bilaabo bacda salaada casar ilaa 8 habeenimo meherado loo furtay in lagu shaaheeyo ku doodaya arimaha siyaasad iyo asaxaabta xisbiyida.

Waxa wax laga xumaado ah in raga qaarna halka ay faadhiistaan 1 duhurnimo inta ay qaad qaataanay ka kacaan 10 habeenimo, ugu yaraan wakhtiga intaa

leegna ay ku luminayaan fadhi iyo qaylo aan faa'iido lahayn.

Taasina waata keentay in au dadyowga aduunka ka danbayno aqoon ahaan, nolol ahaan, siyaasad ahaan iyo horumar ahaanba.

Akhriste isku day haddii aad ka mid tahay dadyowgaa aan soo xusnay inaad is daba qabato oo aad nolasha wax ka badasho.

Wakhtigaa ay dayaceen dadkaasina waa laga xisaabin doona maalinta aakhiro sida uu Alle inoogu sheegay qur'aankiisa.

Fikirku Ma Furaha Waalida?

Erayga fikir ma lihin, waxa aynu kasoo toobal caaraysanay afka carabiga.

Waxaan isku dayay inaan helo dhigiisa afkeenn, iimase suurtol galin. Iyadoo ay taasi jirto haddana waxa aan afka kala maagayaa inaan idhaahdo soomaalidii hore ma fikiri jirin.Waxaase ka gayn waayay aqoon yari aniga afkayga I haysa, waxaanan aamisanahay haddii baadhitaan la sameeyo in lasoo helayo raqda ama eraygii kaalintaa ugu jiray.

Waa tahay, in waxa la cuno hammuun ayaa keenta, in wax la cabbanaharraad ayaa keena, in la nastana daal ayaa keena, haddab maxaa keena in la fikiro? Jawaabta su'aashaas waxaan udaynayaa xikmadan shiiney ah oo leh sidan "*Dhibtu waa furaha fikirka …. Fikirkuna waa aqoonta….. aqoontuna waa furaha guusha… guushuna waa furaha badhaadhaha"*

Haa!, halkaa waxa inooga dhuroobay in fikirku yimaado dhib ka dib, dhibina waa ina, haysataa. Su'aasha labaad ee meesha ku jirtaa waxay tahay fikirku ma dadka oo dhan ayaa uu ka yimaada mise in gooniya oo faro kutirisa ah? jawaabtu waa in kooban hadaan la murmayan, maxase loo yaqaanaa inta kooban?

waxa loo yaqaanaa mufakiriin Haa!, haddaba hadaynu nahay soomaali ma leenahay mufakiriin muuqda?

waxaan maqlay aqoonyahan,waxaan maqlay dhaqaale yahan, waxaan maqlay qabiil yahan, waxaan maqlay qalinyahan, waxa aan maqlay dagaal yahan waxa aan maqlay …… mase ma maqal mufakir yahan!

jawaabtu ma tahay ma lihin mufakiriin muuqda ama naanaystan ku suntan? waxaan filayaa haa! su'aasha kale ee iswaydiinta mudani waa maxaa keenay inaynu yeelan wayno mufakiriin? Tolow ma cilmi yaribaa? Ma caqli gaabnibaa? Ma cabsi ama ku dhicid la'aanbaa? Ka hor jawaabta waxan doorbidyaa inaan waxa ka iftiimiyo aragtida fikirka ay ka qabaan dadkdeenu .

Fikirku badi waxa uu ka dhex dhacaa qof iyo maankiisa, taasina waxa ay keentey in qofku ku mashquulo ku foognaanta iyo falaqaynta hadba waxa maaankiisa ka guuxaya, hilmaamisana inuu si dhug leh ula socda waxa agtiisa lagu hayo.

fikirka waxa aynu u qaybinaynaa laba qaybood oo kala ah fikir taban iyo fikir togan, haddii aynu soomali nahay waxaynu naqaan fkirka taban bes. Waayo waxa dadka badidiisu u arkaan in "*fikirku yahay furaha waalida"*

waxaad maqlaysaa hebel waa uu dhuubtay, hebel waa is diley, heblaayo waa dhuubatay, markaad tidhaa ogow sababta keentay waxa lugugu jawaabayaa way fikireen. Tani waxay keentay in fikirkii laga cararo in la sheegto daaye, waayo waxaad arkaysaa qof fikiraya oo isku maqan, markaad tiraa maxaad ka fikiraysaana wuxuu ku leeyahay ma anigaa fikirayayba hada badwayn buu ku qarqoonsanaa.

ka sidan ahi waa kii waa kii dareemayay een wali isku dhiibin waayaha nolosha. Haddaba miyaanay habbooyneyn in dadka loo sheego, laguna baraarujiyo ka hor inta aan la odhan fikira, in fikirku yahay wax wanaagsan oo laysku gaadho, laguna hormaro ee aanu ahayn wax lagu waasho laguna warreero sida dadka badidiisu qabaan.

oday faylasuufad ayaa ardey way diiyay bal in uu waxa ugu sheego jadwalka wakhtiggiisa waxa uu yidhi saacadaas ayaan kacaa aroortii laga bilaabo saacada ilaa saacadaa waxbaan bartaa laga bilaabo sacdaa ilaa sacadaa waxbaan akhriyaa, laga bilaabo saacadaana waxbaan qoraa kadibna waan seexdaa. faylasuufkii wuxuu uu yidhi hadmaad fikirtaa? wiilkiina waa aamusay kadibna waxa uu yidhi jadwalka ku darso waxkhi aad fikirtid, haa! Idin odhan maayo jadwalka ku darsada wakhti wad fikirtaan oo waa aynu is ognahay waxanse idin leeyahay in fikirku wanaagsanyahay ogaada kadibna ku darsada xisaabta. Hadda ayuun bay tahay baan filayaa inaan ka jawaabno su'aashii ahayd maxaa aynuu yeelan waynay mufakiriin.

Dadka kama caqli yarin laakiinse waanu ka cilmi yarnahay, walow aynaan dareensanayn, waayo cilmigu ma'aha ka kutubta ku yaala, raga gaar ahina sheegtaan ee aqoontu waata lugu horumaro ee ka muuqata dalka, dadka, diinta iyo duunyadaba.

Horumarna halkaan ka taagnahay nina loo sheegi maayo. Aqoon yaridaasi waata sababtay cabsi iyo

fulaynimo hor leh waayo ka cilmi baadhis sameeya kuma helo abaaal marin, xataa looma qiro wax qabadkiisa, taasina waxa ay ku ridaa niyad jab iyo kasoo kaban waa. waxaana inoogu wacan baan filayaa xaasidnimo iyo xiqdi uurkeena ku jira, ogsoonawna Inta aad cid xisdiyaysid In horumar kaa dheer yahay.

Ta labaad oo ah baqasho aynu la baqayno inaynu soo bandhigo fikirkeena.tusaale ahaan:

Marar aan badneyn waxa u holladaa inaan wax uurkayga gubaya qoro, siiba arimaha bulshada, aniga oo qolkayga ku jira qalinkayga haysta,qoraalkaygana badhtanka marinaya waxa ii soo gala dad (oo maxaan dad kuu odhanaya asaxaabtayda) ka dib warqada waan iska laalaabaa,qalinkaygana furka ayaan ku xidhaa,haddiiba uu I su'aalo maxad qoraysaana, waxaan ku idhaa wax yarbaan mul mulaqayaa. Maxaan u odhan waayay fikir nooca ah ayaan qorayaa, iyo arinbaan falanqaynayaa oo aan rog rogayaa? waxan u odhan waayay waxaan ka baqayaa inuu inad jabiyo oo uu yidhaa waad waalanaysaa iyo waad iswareerinaysaa!!

Markaa miyaanan ka mid noqonayn fulayaasha fiikirka, haddiibase la igu yidhaa fulaay fikirbaad tahay maxan ku diidayaa.

Waayahay haddaba aynu fikirno si aynu u horumarno, fikirkeenana yaynaan la baqan waxan u arkaa wax

wanaagsan oon laga wanaagsanayn, iyada oo ay tahay nin iyo fahankii waan dhameeyay oon dhuuxay maqaalkii ibraahim yuusuf axmed “hawd” ee ahaa fulayada fikirka ma odhan karnaa boqolkiiba boqol wuu saxsanaa oo bani aadam baaa qoray aan qalad laga waayayn, waxanse u arkay dhinbiil hurisey dhuxul maankeena ku kaydsaneyd, waxan u u arkay hormuudnimo iyo kaalin aan gabnay oo uu buuxiyay, waxanu inaga mudan yahay bogaadin ee inagama mudna in qoraaladiisii hore la deedifeeyo.

Had iyo goor qofka xumaan lagama malaysto waa laga qurxoon yahay. in keeb la yuurar la ahaado oo dhufayska lugu jiro, qofkii fikir keen ahaadana lugu dhoog barto iyana waa laga qurxoon yahay, Islaamku inuu wanaagsanaa, wanaagsan yahay, wanaagsanaan doona in shaki lagaliyo waa laga qurxoon yahay.haddiise arinku yahay fikirki maayo, fikirkaagana qaadan maayo, wada fikiri maynana anigu kama hadal.

Haddaba ma waxa inalagudboon inaan la soo taagnaano bas islaamku culuumtaasu isaga ikhtiraacay mise inaan soo ceshano, soomalidu waxa ay tidhaadaa “aabahay baa geel lahaa anaa dameer le ayaa dhaanta” islaamku amase soomaali waxaas ayay ahaan jirtay waxa ka muddan innaga oo ka hadalna siduu maanta yahay, aynu ogsoonaano kaliya inaynu wax qabsan karno markaynu si wanaagsan u fikirno noqonana dad waaqiciyiin ah.

Walaalayaal ha la doodo; hala kala faaiidaysto, ha lays qanciyo, ha lays tilmaamo, oo ha lays toosiyo, ha lays

qadariyo, yaanse la murmin; yaan la is dhibsan, doodu yaanay noqon “mid mid ku tag” iyo shakhsi nacaybsi .

Ugu danbayn waxaan qormadan ku soo xidhayaa heesta tidhaahda:

Ninka ugu ildheer baa,
Dadka ugu ayaan daran,
Waxaan la arkayn baa,
Isaga uun u muuqda.

Dardaaran waxa aan kula dardaarmayaa dhamaan bulshada soomaaliyeed meel kasta oo ay joogaan inay yeeshaan aragti.

Aragtidaas oo dhinaca wanaagsan taasi oo ay hadii ay la imadaan anfaci karta nolashooda iyo aayahoodaba, niyadana kasaaraan in aanay horumar gaadhi Karin taaasi oo ah waxa dib uga reebay qayrkood

Waxaan la hubaa in aynaan si dhaba ufikirin, haddii aaad tahay qof dhugmo leh dharaartii Alle keenaba dhaayahaagu waxa ay qabanayaan intaas oo dhacdo.

dhacdooyinka qaar inta ay farxad kugu abuurayaan in ka badan waxa ay kugu dhaliyan mowjado murugo iyo muusanow ah. muragadu waxa ay holac iyo halase ku hurinaysaa laabtaddii ay awalba waaayuhu la ciifiyeen.

Halka muusanowguna rifan iyo lisan ku samaynayo maanaakagii ay awalba meherdaha walaacu ku furnaayeen.
Adiga oo dhibta qaba, ayaa hadh iyo habeenba dhawaaqyo dhiilo lihi kaaga imanayaan intii aad wada

dhalteen ee soomali maxamed lo odhan jiray meel ay joogaanba.
Markasaa galgalad mooyiye gam'a luguu diidayaa, rafaad mooyiye raaxo lagaga dhaaranayaa. xaalada ba'an ee aad ku jirtaa kuu kali ma aha ee kumanayaal soomaali ah baa kula qaba oo dareen umadeed hayo haddii aanay kaaba darnayn waxase ay awoodi laayihiin erayaddii iyo asluubtii ay ku cabari lahayeen.murugada iyo ciilkaanbiga ay qaban aamusnaantoodaas awood la'aanta keentay ayaad marar badan is odhanaysaa malaha dadku xaaladan waa la dhacsiyiin.

- *wakhtiyada socdaalka*
- *ayaamaha silsilada ah*
- *xilliyada bal suure*
- *soojire hadaad tahay*
- *sadarada dib uga noqo.*

Jaceyl

WAA MAXAY JACEYL**?**
Waa su'aal in badan kusoo noq noqata bani aadamka, balse ay adkaato sida uu ugu jawaabaan.

Haddii aynu dib u baadhno dhacdooyinka iyo sooyaalka nolasha, xaqiiqdii waxaaynu odhan karnaa qoomiyadaha aduunku ku dhaqan haddii la waydiiyo waa maxay jaceyl? Shaki kuma jiro afkaydoonaan ha ku hadlaane, in ay wax inooga sheegi karaan jaceylka.

Haddaba adigoo ah soomali maxaad ku tilmami kartaa jaceylku inuu yahay? marka lasoo hadal qado se maxa maskaxdaada ku soo dhaca? sideebu se ruux kastaa u arkaa? maxase lagu gartaa qofka uu ku dhaco.?

Haddaba inta aynaan bixin jawaab celinta su'aalahan adigu shaqsiyadaada ma aamin santahay in uu jaceylku wax jira yahay? maxadse ku cadayn kartaa inuu yahay wax jira?

Haddii aan aan jawaab bixin ku samayno su'aasha aragtidayda waxaan odhan karaa waa awood cajiiba; oo uu ilaahay noolaha isugu beero, dareenkaas oo u kala baxa dhowr qaybood sida dhiiga aadamuhuba ugu kala baxo qaybo A, B, AB,O oo uu qofku la wadaagi karo noolayaasha kale. sidda aan qabo dareenka jaceylka waxa jaceyla la isugu gudbin karaa taabasho, cod, aragti, sheeko iwm, haddaan dhankale iska taagno

dareenka jaceylku waa hiigsi haabasho, hawaawir iyo hami ku hayn qofku niyada ku hayo qof kale.

Aan cabaar is dul taagno qaybaha jaceylka u kala baxo:

1-(A) waa mid aad jeceshaya hooyadaa iyo aabaha,walaalaha iwm.

2-(B) waa mid aad wadankaaga,dadkaaga iyo diintada, iwm.

3-(AB) waa mid aad jeceshahay qof gaara oo aad rajo ka leedahay.

4-(O) waa mid aad jeceshahay dhaqankaaga iyo nolasha aad ku jirto oo dhan.

Run ahaantii jaceylka dhabta ahi ma gudho mana dhamaado, had iyo goorna qofka wax jecli afkiisa kama dhigo noolaha uu jecel yahay. mar arinkaa la falan qeeyay oo la iswaydiiayay waxa la isla gartay hadal hayntaas joogtada ah inuu ugu dhawaanayo, wehelna uu ka dhiganayo; waxa kale oo la xaqiijiyay in ay riyadu xad dhaaf tahay, waanay iska suurowdaa inuu habeenka ku qarwo.

Ummad kastaaba si ayay u qeexdaa jaceylka laakiin diinteena islaamku waxa ay ku taagan tahay jaceyl iyo raxmad, taasina waxa ay kuu cadaynaysaa in uu jaceylu yahay shay nolasha umihiima.

Anigu waxan aamin sanahay in haddii aanu jaceyl jirin ayna dunidu jirteen, tusaale hooyo iyo ilmaheeduba may wada joogeen haddii aanu jirin rixinka iyo jaceylka fiican ee Alle isku beeeray.

Jaceylku faa'ido iyo khaasaraba wuu leeyahay, laakiinse wax yeelada ugu daran ee jaceylku keena waxa weeye marka u horaysa ee aad dareentid inuu ku taabay dareen jaceyl, kaas oo macnihiisu yahay xanuun cusub oo kuggu soo kordha niyad xumi, gasiinkood ka go'did iyo daryeel la'aanta naftaada. waa astaamaha jaceylka, marka aad qof jaceyl uqaadid, oo isna kuu ogayn inaad dunida ku nooshahay iyo in kale.

Jaceylka noocas ahi waa ka ugu daran, dhakhtar kaa daweyn karaana ma jiro, ilaa aad heshid tii/am kii aad jeclaatay taasi waa dhibtooyinka ugu waa weyn ee uu sababo jacelku.

Jaceylku waligii waa uu jiray, waan uu jiri doona, waxa aynu nahayna mataano waxa aan ku kulanaa nolasha.

Jaceylku isagu inooma baahna ee anegaa ubaahan, jaceylku waa wax soo jireen ah ilaa iyo abuurkii iyo xaawa iyo aadan.

Jaceyla kama maarano isaguna inagama maarmo, jaceylku waa cudur dawadiisuna waa helida qofkaad jeclatay oo ku garab taagnaada. Waxa jira dad u dhintey jaceyl dadkaas oo ka soo jeeda qoomiyo kala gadisan,

waayo jaceylku ma yaqaan madow iyo cadaan iyo jinsi toona (lax dhunkan abaar moog) dadkaas waxa kamida **Layla** iyo **Qays, Cilmi** iyo **Hodan, Juuliya** iyo **ROMEO Grendiano** iyo waliba dad fara badan oo aanan halkan kusoo koobi karayn.

Jaceylka Sabankan Iyo Waayadii Hore?

Haddii aan is barbar dhigno jaceylka sabankii hore iyo jaceylka waayadan danbe waxa aad mooda in waxa fara badan ay ku kala duwan yihiin.

Jaceylkii waayaddii hore waxa uu ahaa jaceyl aad u xiisa badan, lehna munaaficaad iyo waxtar.

Lammaanaha is calmada waxa ay isku ahaayeen ul iyo diirkeed, dhib iyo dheefna way wada qaybsan jireen.

Wakhtiyadii hore jaceylku dadka agtooda qiimo ayuu ka lahaa, laakiinse wakhti xaadirkan magacii ayuunbaa sii nool.

Labadda qof ee lamaanaha ah waxa ay ahaan jireen lamaane isku qanacsan nolol ahaan, iskuna kalsoon, midba midka kalena udaacad yahay.

Gabadhuhu waxa ay ninka ku dooran jireen raganimadiisa, kartidiisa, aftahanimadiisa. halka raggu ku dooran jiray quruxda, nasabka iyo waxyaalo kale oo fara badan.

Labbada qof ee lamaanaha ah waxa ay ahaan jireen dad waayahooda laabta ku haysta, sida lagu ogaaadana waa ay adkaan jirtay.

Barkulanka ay lamaanayashii hore kulmi jireen waxa ay ahayd millayga gu'ga, marka ay nimcadu da'do reeruhuna barwaaqaystaan, xooluhuna barqa dharag galinka hore ay afka dhulka ka qaadan.

Fiidnimada marka ay tahay ee xoolaha la xareeyo ayaa ay dhalin yaradu iskugu iman jireen kambalka reerka, haklaas oo ay ku haasawi jireen, iskuna waraysan jireen.

Inanka / inantu mid walba dhankiisu balan ka oofan jiray, waxanay ahaayeen dad balanta sideeda u oofiya.

Laammanuhu waxa ay ahaa yeen kuwo leh hal-beeg nololeed.

Wakhti xaadirkan aynu maanta joogno wax walbaana way is badaleen. siddii hore iyo si ku dhowtoona ma aha.

Lammaanaha wakhti xaadirkan markaynu barbar dhigno lamaanayashii wakhtiyadii hore iskuma dhawa.

Inanka /inantu kuma koobna kaliyaata hal qof ee mid walbaaba waxa uu la haasaawayaa shan iyo wax ka badan; mana garanayaan qiimaha iyo qaayaha uu leeyahay jaceylka laga daacada yahay.

Aragtidayda haddaanka hadlana isma lihi jaceyl ayaa jira magciisii uunba laakiin wali sii jira, waayo jaceylku waxa uu qiima yeesha marka ay lammaanahu isku kalsoon yahiin, iskuna daacad yihiin, nolol ahaana isku qanac san yihiin.

CADOWGA JACEYLKA

Aduunka wax walbaaba waxa uu leeyahay cadow,siddaa si lamidana jaceylku waxa uu leeyahay cadow farabadan, waxaana kamida kuwan soo socda:-

- Daacad la'aan: haddii aanay labada qof ee lammaanuhu ayna ahayn lammaane isku daacada jaceylkaasi ma noqon karo mid midho dhala.
- Kalsooni daro: haddii aanay lammanuhu isku kalsoonayn ma hana qaadi karo jaceylkoodu.
- Qanacsanaan : haddii aanay labada qof ee lammanaha ahi isku qanacsaneyn ma suutro gali karto in ay nolol abuuran.
- Khiyaanada : khiyaanadu waxa ay kamid tahay kuwo ugu mahadho badan, haddii ay timaadana ayna lammaanuhu nolol wadaagi Karin

SIDEE AYAAD U KASBAN KARTAA QOF AAD JECESHAHAY?

Waa haboon in aad kasbato qalbiga qofka aad jeceshahay si aad qalbigiisa u hantido.

Waxa jira wax yaabo kuu sahli kara kasbashada qalbiga qofka aad jeceshahay,waxaan kamida :-

- Ugu horeyn ha noqon qof ku dagdaga u bandhigida qofka aad jeceshahay fariintada jaceylka.
- Waa inaad tahay qof furfaran lehna dabeecad wanaagsan.
- Haddii aad tahay qof dumara waa inaad aad ahaata qof xishood badan.
- Waa inaad tahay qof soo jiidato leh.
- Mar walba ka run sheeg wixii niyada kuugu jira.
- Haddii aad tahay wiil / gabadh isku taxaluuji sidii aad u ogaan lahayd waxa uu xiiseeyo /xiisayso qofka aad rabto.
- Mar walba ugu sheeke waxa uu xiiseeyo /xiisayso.
- Noqo qof mar walba oofiya balanta ilaaliyana.
- Ku da'daal inaad hadiyado ugayso qof aad calmatay.
- Noqo qof marka uu qaldamo qaladkiisa qirta,raali galina ka bxiya qaladkaas.

Bal aan soo qaadano sheeko jaceyl oo dhaba waxaney ku bilaabmatey sida tan:

JACAYL TAARIIKHDA GALAY

"Dhirta xididka hoosaa
Dhulka loogun beere
Dhismahooda weeye
Kii dhaba jacaylkana
Halkii kama dhaqaaqoo
Dhidibaa u aasane"

Xuseen Aw Faarax Dubad(AHU)

Mala awaal maaha, sheeko uu curiyey hal-abuur farshaxana oo hawraarta iyo hadalkaba Rabbi hibo u siiyeyna ka fog, Been iyo sheeko berelayna ka weyn, waa sheeko run ah oo ku aroorta qiso dhab ah oo ka dhacay jamhuuriyada barakaysan ee soomaaliland, hadda qiso dhab ah keliya maaha waa sheeko run ah oo dhiiga iyo dhuuxu ku shubmaayo marka aad akhrido, ilmada haysan maysid oo maxaad ba haysan oohin bay labada indhood ku casaanayaane, qalbi dhagaxa kii lahaa wuxuu noqon doona kal laxiiba, oo sida qorraxdu u dhalaaliso barafka ayay sheekadana u dhalaalin doontaa hiyigiisa. Inta aan ararta idinka daayo bal sheekada ila dhugta oo sidii gaariye aan idhaahdo :

“Maan curub bislaadiyo
Canbaruud idiin guro”

Maxamed waa wiil ka mid ahaa dhalinyarada ku noolayd magaaladda burco, markii ay da’diisu cagocagaynaysay 12 jir ayay kala tageen aabihii iyo hooyadii halkaasna waxa ka soo wajahday nolol adag oo saamaynteeda leh, waxa uu la kulmay nolol murugo badan, wakhtiguna ma saacidin ee wuu ka hiishay ilayn horaa loo yidhi :

“Markaad wacantee wakhtigu kula jiro
Ma waydid cid kula walaala”

Hal-abuurna waa tii hore looga hayey :

“Wakhtigu nacasaysanaa
dhalintu waji garadsanaa
Weelkaagu markaanu buuxin
Waxsaarku ku qaban ogaa
Weedhaadu itaal yaraa
Walaalkaa kolay ku tahay
Baryadu weydaysanaa
Wax hayntu mar fiicanaa

Wedkiyo noloshuu hayaa
Isagaa wax bixiyoo
Anna aan wakiishee
Illaahay wanaagsanaa ”

Cid garab gasha oo hiil iyo hoo hagar la’aana u gaysataana ma jirin, hirdanka noloshana keligii ayaa la halgamaayey oo hadba mawjadi mawjad kale u sii dhiibtaa. Ninka ragiise waa kii kufee kacee, waa kii mar uun tashadee go’aan buu gaadhay, wuxuu qalbiga iyo quluubta u sheegay in uu iskaga hayaamo kobtan ay kadeedka iyo kaacakufka nololeed ku keliyeysteen, wuxuu is yidhi “raga socod waa u door hadduu mawdku daaye” maad adna ka guurtid geyigan sidii giriyaad aad joogto garab iyo gaashan aanay cidna kuu ahayn, wuxuu xasuustay tuduc cabdi iidan lahaa oo ahaa:

“Shil ku dhimo nin raggii waa gayaa, sharafna noolowe”.

Maalmahaa waxa maankiisa dhex miranaysay hees uu lahaa Axmed Saleeban Bidde oo caan ahayd oo odhan jirtay " waa laysku soo noqon wixii nool adduunyada" meerisyo ka mida oo ahaa :

"Sawkii nebigu yidhi
Haddaad nolosha qawadaan
Nabad gala'e haajira"

Waxa uu talo ku gudoonsaday in uu suudalo(tahriibo), safar nolol ama geeriya u badheedh hadba kii ay qudhiisu noqoto, Burcana ka ambabax, nasiib xumo waa qadarka eebbe wuxuu u gacan galay ma gafe ajashiisa dul dhigay in uu bixiyo $5000(shan kun oo dollar), muxuu bixin ba lacagta intaa leeg ma haystee oo cidna uma haysee, bakhtigaa u xalaala baabacadiisana boqol shillin kuma ogee, talaa ku ciirtay oo arinkiisu wuxuu noqday cirkaa soo dumee celi, dhulku cararye soo qabo, cid iyo ciirsi uu kula ciira ma garanayo, ceelna uma qodna cidna uma maqna.
isagoo wax uu sameeyo garan la' oo dhulka dul socdana haddana dhaafsiisan, cirkuna uu u dhow yahay haddana uu ka dheeryahay ayaa qalbigiisa waxa ku soo dhacay Nasra cabdi. Oo Nasri waa ayo?

Nasri waa inan dhigata dugsiga Cabdale Nuuri ee Burco oo maraysa fasalada labbaad, xagga nolosha waayihii adkaa ee Maxamed waxba may dhaamin oo labbadii cishee ugu dambaysay dugsiga way u lugaysay ka dib markii loo waayay lacag ay bas ku raacdo, intii uu magaalada burco joogay ayuu jacayl xeel-dheeraday, oo midba dhinaciisa uu dhaawac qabay, oo laysku

dhaartay, oo wadnaha laysku dhiibay uu ka dhaxeeyay Maxamed iyo Nasra.

Boholyowga bogga iyo beerka barada ka samaystay waa sababta ugu wayn ee Nasri noqotay qofkii ugu horeeyay ee uu Maxamed soo xasuusto, una xaal-waramo. Maxamed oo ooyaya ayaa habeen arbaca oo oo bishii April ee sanadkii 2014 soo wacay Nasra oo markaas uun dhamaysay dhiqista weel lagu casheeyay, wuxuu uga waramay xaalkiisa inkasta oo aanay suuro gal ahayn in uu daruusta nololeed iyo dareenkiisa u wada sheego sababtoo ah waxa aad u yarayd lacagta ku jirta telefoonka uu ku hadlayo, wuxuuse u sheegay in laga rabo lacag dhan $5000(shan kun oo dollar) isla markaana aanu haysan cid kale oo ka bixisa, Nasri waxay ka qoratay Taar gacmeedka(moobil) ayay si joogta ah uga heli karto, isna u sheeg lana ballan in habeen dambe xilligan oo kale ay soo wada hadlaan.

Nasri habeenka jiifka way xamili wayday, hurdo hadday holatana waxa kolba horteeda imanayay Maxamed oo ooyaya markaasay jidhiidhico jidhkeeda ku rooraysay, wax lacaga oo ay haysay ma jirto, habeenkii oo dhan waxay ka fikirtay halka ay ka heli lahayd lacagta ku xidhan nolosha Maxamed. Mar dambe ayay xasuusatay in lacag aanay garanayn qaddarkeeda ay ku aragtay khasnadda dukaanka edeeed oo ku yalla goobta loo yaqaano Sakatal Yuhuud ee magaalada Burco. Subaxnimadii habeenkaas waxay u sheegaytay edeeed in ay dugsiga ka baaqan doonto maadama oo la fasaxay fasalkeedii, iyada oo ay ujeedadeedu tahay sidii ay u tagi lahayd dukaanka ay lacagtu taalay.

Nasri waxay quraac u qaaday Cabdi Cali oo habeenkii ilaalinaayay dukaanka waxayna fursad yar ku heshay in ay furto khasnadii ay lacagtu ku jirtay, gacanta markii ay galisay waxay ka soo bixisay wixii ku jirayba si degdeg ah ayay ula soo baxday, xitaa Cabdi macasalaama may odhan. Iyada oo aan ka fikirin waxa kaga iman kara lacagta ay qaadatay ayay Maxamed la hadashay wakhti ilaa 11 saacadood ka horeeya kii ay balansanaayeen, waxayna markii uu telefoonka ka qabtay hadalka ugu bilowday Maxamed xageen lacagta kuugu soo diraa?. Maxamed oo faraxsan ayaa u sheegay waxayna u dirtay $8000(sided kun oo dollar) oo ka badan lacagtii ay baahidiisu ahayd markaa iyada oo sii raaacisay inta kalana badda kaga gudub(doonida ku raac).

Nasri maalintaa gurigii ay ku noolayd may tagin ilaa ay lacagtii dirtay, maalintii labaad ayay gurigii tagtay iyada oo diyaar u ah xaalad kasta oo ay kala kulanto, markii la waydiiyey halka ay lacagtii gaysay waxay dafirtay in ay iyadu lacagta qaadatay, balse saddex maalmood markii jir-dil loo gaystay ka dib waxa ay qiratay in ay iyadu lacagta la baxday.

Nasra aabaheed oo ku noola meel 150km kaga aadan dhanka magaalada burco geelna ku dhaqda ayaa warkii la gaadhsiiyey, loogana xog waramay wixii ay sida ay wax u dhaceen loona sheegay inantii uu dhalay in loo haysto lacag, warcelintiisana waxay noqotay in uu ku tiraabo ama dila ama hala xidho.

Nasra xabsiga ayaa loo gudbiyey iyadoo qof daymaysan ah, waxay ku noolayd xusuustii Maxamed iyada

sugaysay in xilligu samaan doona, suuganta jacaylka ah ee ay ka mid yihiin heesahani ayay isku madadaalin jirtey:

Adduunyadu qaribana
Qaxar iyo dhibaatiyo
Qalalaase badanaa ……..

Jacaylkan I dhaawacay
jacaylkan I dhaan rogay
jacaylkani dhaansaday
jacaylkii dhabta ahaa
soo dhawaatay halistii
markaad iga dhaqaaqdee
Bal in aan ku dhiirado
dhexdaan xidhanayaa……

Nasri waxay jeelkii ku jirtay sanad iyo lix bilood, Maxamed oo safar dhib badan ka dib illaahay nabad geliyey waxa uu gaadhay oo uu galay dalka Norway, maalin kaliya Nasri qalbigiisa kamay bixin isaga oo muxubada jacaylka la jidh dubaaxinaya, ayaa qalbiga caashaqu hadhsaday hawraar noocana hadba ka dhex tirin jirey :

Arageena kala maqan
Muuqeena kala dheer
Maankeena wadda jira
Isku muhashadeena
Haddaa mala dhabay noqon

milka faalka soo baxay
millaygu dabayshuna
hadba meerto weeyaan
Intuu marinku xidhan yahay
Muska ooda laga gurin
Mar uun ila sug caashaqa
Anba waygu maranyee
Haka baqan gacmaha madhan
Meher yaanu kugu dhicin
Iska samir mar huunooy
Tii illaahay baa maqan

Maxamed halkaa intii uu joogay waxa uu ku tusmaynaayay sidii uu ku heli lahaa dhaqaale uu Nasra jeelka kaga sii daayo kadibna ku arooso, noloshiisa lacag uu ka jaray iyo lacag uu ka soo ururiyey dadkii kula noola magaaalda uu joogay ka dib waxa uu ka soo bixiyey lacagtii loo haystay Nasra. Maxamed iyo Nasra oo mid kasta uu niyada ku hayay ballankii jacayl ee dhexdooda yaalay nolol adag oo uu midba walba maray ka dib Maxamed oo soo noqday ayaa Nasra ku aroosay xaafada Xamarta ee magaalada Burco. Saw aragii ugu horeeyay ee uu Nasra indhaha ka qaado muddo badan ka dib Maxamed ma odhan:

Sida ubax gu' doogsaday
Ama kayn ugbaadloo
Afka saarin xooluhu
Adigoo aan ii iman
Urta caafimaadka leh

Kollay adiga inaad tahay
Saw udgoonkii maan garan
Ma ogtahay jacaylkuna
Eebada siduu halis
Wadnaha kaala eegtuu
Anna awlax ii daray

Nasrina saw Hal-celin(jawaab) kula may soo boodin :

Sida oogta waabari
Ama maalin ciidoo
Tukadeen islaamkii
Anigoo ku arkayn
Anba saw iftiinkii
Kollay adiga inaad tahay
Kama garan ilayskii
Ma ogtahay jacaylkuna
Indhahaaga oo shana
Sidaad iigu oydaan
Anna kuu ilmeeya.

Guntii iyo gabaggabdii waxaan leeyahay lammanayaasha is jecel wakhtigunausamaxay in ay nolol wadaagaan Allaha ha idinku guuleeyo hadafka nolasha aad ka damacsan tihiin, kuna da'daala wada jirkiina.

Mucaashaqiinta ku kala maqan cadhada iyana waxaan leeyahay dhexdiina ka saara khilaafka nolashana halkiinii kasii wata, iskuna dul qaata.

Ugu dan beyn waxaad baaq u diriyaa mucaashaqiinta soomaalida oo aan leeyahay unka jaceyl ku danbaya nolol samo iyo sareedo wadata Allana ka raali yahay ;waxan mawduucan kusoo gunaanadaya gabay uu tiriyay xidigii jaceylka Allaha ha unaxriistee abwaan *mucaashaq cilmi ismaaciil liiban"boodhari*" gabaygan wuxuu cilmi kaga hadlaya sida uu go'aan ugu gaari doono jaceylkiisa uu heli waayey, waxaanu yiri :-

- Intaan adigu kugu gooniyaa geed hadaan la hadlo.
- Ama gawaan qodayo may gama`sanaateene.
- Gaalada ha joogtee sidaa gacal ma yeeleene.
- Gardariyee maxaan hodan cabdaay kaaga go` I waayey.
- Sidii aad go`aygii tihiyo macawistaan goostay.
- Ama aad godkii aakhiriyo geeri iga baajin.
- Ama aan gayiga lagu ogayn gabadh kaloo joogto.
- Gardarriyee maxaan hodan cabdaay kaaga go`I waayey.
- Gadiidkii aan toosaba adaan kuu guntanaayeye.
- Goobtaan istaagaba dhulkaan godod ka jeexaaye.
- Siddii aad gidaar tahay maxaa I kaa garab taagey.
- Gardarriyee maxaan hodan cabdaay kaaga gu`I waayey.

- Mana guursan kari waayinoo geesibaan ahaye.
- Adaan kaa gungaadhayey oo helay geddaadiiye.
- Gardarriyee maxaan hodan cabdaay kaaga go`I waayey.
- Hataanse bal waan guursan haddii guulle ii wacaye
- Oo waliba gedahaan ka dayan, gobolladiiniiye
- Iyadoo gabiib u eg markaan ugu kaxaynaayo
- Ee aan gahaydhiyo la tago gubanadii hawdka
- Ee aan ganuunta ugu shubo gooha labenkeeda
- Gibladiyo cayaaraha markuu,geel jiruhu tumayo
- Ha geyoobin waataad lahayd gool jabaan heleye

Talooyin Wax Ku Oola

- Ugu horeyn meelkasta oo aad joogto Alle ka cabso, oo samee wixii Alle ku faray , wixii Alle kaa xaraam timeeyeyna ka fogow.
- noqo qof diin iyo akhlaaq iyo wanaag u la saaxiiba.
- Haddii aad doonayso inuu Alle ku sharfo, fuli awaamiirta Alle.
- Ka dheerow macaasida.
- Noqo qof marwalba Alle xidhiidhkiisa wanaajiya.
- Noqo mar walba qof tusaale laga dhigto, hana noqon qof marka la arko xumaan lagu xasuusto.
- Noqo qof wanaag iyo waxtar lagu xasuusto.
- Haku jees-jeesin adoomaha, kibirkana ka dheerow, waayo Alle ma jecla dadka dhulka korkiisa isku dul kibriya, ama iska weynaysiiay dadka.
- Qiime dadka si adna laguu qiimeeyo.
- Ka dheerow wixii xumaana, sharaftaadana hoos udhigaya.
- Ha dareen siin qofka kaa hooseeya inaad ka aqoon iyo cilmi badan tahay si aanu u niyad jabin.
- Ahaw mar kasta qof dadka uu la nool yahay tusa waji fufuran oo faraxsan
- Noqo markasta qof ku mahad naqa nimcada uu Alle siiyay.
- Ku samir masiibo kasta oo kula soo darista, waayo Alle waxa uu jecel yahay dadka samra.
- Haddii aad doonayso inaad gaadho halka aad hiigsanayso,waa inaad dhagaha ka furaysataa

dhamaan dadka ku niyad jabinaya “ogow qof ma jiro horumar gaadhay haddii uu gaadhayna waxa uu ahaa mid dhagaha ka furaysta dadka noocas ah”

- Mar kasta arimahaaga u talo saaro Alle (sw)isaga ayaa kaaga filane.
- Ku da’daal mar kasta sugnaanta iyo ku toosnaanta jidkii ay mareen kuwii Alle raalida ka noqday.
- La saaxiib dadka ehlu-diinka iyo wax-garadka.
- Waqtigaaga firaaqada ah ku buuxi wax ku anfacaya aduun iyo aakhiraba.
- Kobci aqoontaada mar kasta maadi iyo diiniba waayo aqoontu waxay kaa caawinaysa in aad raacdo jidka toosan.
- Mar kasta Allah ka filo wax wanaagsan kuna kalsoonow.
- Yaqiinsanaw in Ilaahay gacantiiusa ku jirto tawfiiqda iyo waxaad rajaynayso.
- Mar walba noqo mid waalidkii u sama fala kana dalbada duco.
- Ahaw qof ku sifaysan daacadnimo, hab-dhaqan wanagsan,balantana oofiya.
- Mar kasta ku faraxsanow booska aad nolosha kaga jirta.
- Waligaa isku day inaad ka fogaato xiqdiga iyo xaasidka.
- Xasuusnow mar kasta macaan gooyaha oo ah geerida.
- Ku dadaal mar walba inaad ka shaqeyso wanaag iyo islaaxa ummada

Xigasho

Waxaan halkan ku cadaynayaa maqaalo aan soo dheegatay, markii aan u arkay in ay yihiin kuwa waxtar leh, u jeedada ay ka hadlayaana tahay mid wax ku oola.

Waxaan ku cadayn doona magaca ama shaqsiga lahaa wax lafu garto.

- Maqaalka jaceylka su'aasha ah waa maxay jaceyl waxaan kasoo dheegtay Cali dhanaaneeye.
- Maqaalka fikirka waxaan kasoo dheegtay buugga magiciisu yahay "dhab u fiiri waayaha" ee uu qoray qoraa Axmaed Ismaaciil Maxamuud (Axmed Deeeq).
- Maqaalka aqoonta, su'aasha ah waa maxay sababta ay aqoonyahanada soomalidu wax uga badali waayeen dhulkood, balse dhigooda kale ay wadamadooda wax uga badaleen? Waxaan kasoo dheegtay Xanaan Cabdiraxmaan Faarax Cilmi.
- Maqaalka wakhtiga qayb kamida waxaan kasoo dheeggatay Nimco Kayse cabdi Ibraahim.
- Maqaalka qabyaalada su'aasha ah waa maxay qabyaalad, se maxuu yahay qabiil waxaan ka dheegtay Admin@Alimuse.com.
- Maansada aqoonta waxaan kasoo dheegatay buugga "Suugaanta ee fasalada 4aad ee manhajka soomaliland"

- Maansada jaceylka ee ku dhex jirta maqaalka jaceylka ee uu leeyahay cilmi liibaan waxa aan kasoo dheegatay buugga “Xidigaha maasada”.
- Maansada dhaqanka ah waxa aan kasoo dheeggatay buugga “dhawaaqa baxayaa”
- Maansada guurka iyo ciyaaraha hidaha iyo dhaqanka waxaan ka soo dheegtey buugga “sama doon” ee uu qoray abwaan ismaaciil yuusuf cabdi jiheeye

C/RASHIID CALI MAXAMUD

{BUKHAARI}

Buuga waadiga NOLOSHA

C/RASHIID CALI MAXAMUD

{BUKHAARI}

Buuga waadiga NOLOSHA

C/RASHIID CALI MAXAMUD

{BUKHAARI}

Buuga waadiga NOLOSHA